

## Tusmada Warbixinta

Hordhac.....	2
Kal-fadhiyadii Golaha ee 2018ka. ....	3
Fadhiyada ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen.....	3
Warbixinada Golaha laga laga hor akhriyay. ....	3
Xeerarka Madaxweynaha u gudbey si uu dhaqan-galiyo.....	4
Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida u Gudbay. ....	4
Mooshinadii Golaha la-horkeenay. ....	4
Ansixinta Masuuliyiinta Qaran. ....	5
Go'aankii Ansixinta Heshiiska Saami qeybsiga Dekada Berbera ee DP World, Ethiopia iyo Somaliland. ....	5
Fadhi Wada jir ah iyo Khudbad Sannadeedka Dastuuriga ah ee Madaxweynaha.....	6
Ansixinta Miisaaniyadaha Qaran ee Sanadaha 2018 iyo 2019ka.....	7
<input type="checkbox"/> <b>Odoroska Miisaaniyada Sanadkii 2018kii.....</b>	<b>7</b>
<input type="checkbox"/> <b>Odoroska Miisaaniyada Sanadka 2019ka.....</b>	<b>8</b>
Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah .....	10
Go'aanada Goluhu Gaadhey:-.....	10
Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada .....	14
Horumarinta iyo Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Maammulka Golaha. ....	21
Isfaham laga Gaadhay Xeerkaa Kufsigaa ee Muranka Bulshada ka dhex abuuray. ....	24
Wufuudihii Caalamiga ahaa ee Golaha yimi. ....	25
Safaradii loogu baxay Dalka Dibadiisa.....	29
Safarkii Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ee G/Sool iyo Jiida hore. ....	31
Wafti uu Hogaaminayo Gudoomiyaha Goluhu oo G.Sool Xalin Shaqaaqo u tagay...	33
Mudanayaal Golaha ka geeriyooday AHN.....	35
Appendix .....	36

## Hordhac

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Sadexda dhar-dhaar ee Qaranku ku qotomo, sida uu ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah fulinta (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Lagislatioin).

Golaha wakiiladu waa mid ka mida Labada Aqal ee Baarlamaanka Somaliland oo kala ah (Guurtida iyo Wakiilada) oo marka laysku daro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan, Golahan Wakiilada ee la soo doortay September 2011<sup>5</sup>kii waa Golihii ugu horeeyey ee ku yimaada qaab doorasho toos ah isaga oo dhamaystiray hannaankii dimuquraadiyadeed Jamhuuriyada Somaliland. Golahan oo ah Golihii 4<sup>aad</sup> (afraad) oo ay ka horeeyeen saddex Gole oo ku yimi hb Beeleed (xulasho), halka Golahan ahaa kii ugu horeeyay ee ku yimaada Cod shacab Doorashadii 2005<sup>tii</sup>.

Golaha Wakiiladu waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodooduba waa inay yihiin Xubno ka wakiil ah Dadweynaha, waana qeybta 1<sup>aad</sup> ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Ilaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soosaarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39<sup>aad</sup>, Qodobka 53<sup>aad</sup>, Qodobka 54<sup>aad</sup> iyo Qodobka 55<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Sanad kasta markuu dhamaado wuxu soo saara Warbixin Xambaarsan Wax-qabadkii iyo waxyaabihii u qabsoomay Golaha oo ah mid ka wakiil ah bulshada Somaliland, ujeeddada Warbixin Sanadeedku waa in la ururiyo wax-qabadka Golaha Sanad kasta iyo Bulshada lala waddaago waxyaabihii ka qabsoomay Waajibaadkii Golaha ay soo doorteen Qaranka u hayo, iyadoo ah mid xogtii Golaha Bulshada lala waddagayo, taas oo ah cabiraad lagu garan karo hadba intay le'eg tahay talaabada uu qaado Golaha Wakiiladdu.

Intii lagu jirey Sanadkii 2018kii Golaha Golaha wuxuu yeeshay Sadadex Kal-fadhi oo Caadiya, sidaa darteed, Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa waxqabadka Golaha Wakiiladda Sanadkii dhamaadey ee 2018kii oo ka kooban Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay, kuwa dhaqan-galey, iyadoo sanadkaas ay Xeerarkii ugu badnaa dhaqangaleen. Waxa sidoo kale Masuuliyiintii la ansixiyay, Go'aanadii Goluhu gaadhey, Wixii Gudiyaddu qabteen iyo waxyaabo kale si aad u xusuusataan ugana qiyaas-qaadataan qorshaha hawlaha Golaha sanadkan Cusub ee 2019ka una dardar-galino hawlaha Shaqo ee Goluhu Qaranka u hayo.

Sanadkii 2018kii saddexda Kal-fadhi ee Goluhu yeeshay waxay fadhiyadoodu isugayn ahaayeen 91 fadhi, sidaa darteed Warbixintani waxay xambaarsan tahey wax-qabadkii sanadkaas iyo waxyaabihii u soo kordhay Golaha Wakiiladda. Warbixintani waxa lagu xusay hawl kasta iyo dhacdo kasta iyadoo taariikheysan maalinta ay dhacdey iyo wixii ka soo baxay.

## Mudadda Kal-fadhiyadii Golaha ee Sanadkii 2018ka

No.	Kal-fadhiga	Taariikhda
1.	Kal-fadhigii 36 <sup>aad</sup>	10/03/2018 ilaa 08/05/2018
2.	Kal-fadhigii 37 <sup>aad</sup>	07/07/2018 ilaa 08/09/2018
3.	Kal-fadhigii 38 <sup>aad</sup>	25/11/2018 ilaa 01/21/2018

## Tiradda Fadhiyada Goleweynaha iyo Gudiyaddu ay fadhiisteen

No	Fadhiyada Goleweynuhu	91 Fadhi
1.	Fadhiyada Gudidda Joogta	18 Kulan
2.	Fadhiyada Gudiyada kale	31 Kulan
	<b>Isugeyn</b>	<b>107 Fadhi</b>

## Wadarta iyo Dulucda Warbinaha Golaha laga hor akhriyay

Taariikhda	Warbixinta	cid akhridey
11/03/2018	Warbixintaii Heshiiska Saami-qaybisga Dekada Berbera ee Somalilad, shirkada DP-world iyo Dalka Itoobiya wada-galeen	Md. Sacad Cali Shir Wasiirka Arimaha Dibada iyo Md. Yuusuf Maxamed Cabdi Wasiirka Maaliyada.
18/03/2018	Warbixintii Shir-gudoonka ee Kal-fadhiga 35aad.	Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.
19/03/2018	Warbixinta Gudida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Safarkii Tanzania iyo wax Qabadkii Gudiddaas	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiyaha Gudidda
19/03/2018	Warbixinta Gudidda Joogtada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiye xigeenka Gudida
01/04/2018	Warbixintii Wasiirka Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2018	Md. Yuusuf Maxamed Cabdi Wasiirka Horumarinta Maaliyada.
07/04/2018	Warbixintii Gudidda Dhaqaalaha ee Miisaaniyada 2018	Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)
21/04/2018	Warbixintii Xeerka Qandaraasyada Qaranka ee Gudida Ilaalada iyo Dabagalka Hantida Qaranka.	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiyaha Gudidda
23/04/2018	Warbixintii Xeerka Qashinka iyo Fayo Dhawrka Magaalooyinka ee Gudidda Deegaanka.	Md. Siciid Warsame Ismaaciil Gudoomiyaha Gudidda
15/07/2018	Warbixintii Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 37aad.	Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.
15/07/2018	Warbixinta Gudidda Joogtada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiye ku-xigeenka Gudida
31/07/2018	Warbixinta Xisaab Xidhkii Miisaaniyadii 2016kii	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiyaha Gudidda
22/12/2018	Warbixintii Wasiirka Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2018	Md. Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka Hor.Maaliyada.

03/11/2018	Warbixinta Gudidda Joogtada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiye xigeenka Gudida
03/11/2018	Warbixinta Qalab Cusub oo dhagaysiga Isgaadhsiinta ah	Md. Cabdiwali Cabdilaahi Sh. Suufi Wasiirka Boosaha iyo isgaadhsiinta
13/11/2018	Warbixinta Guddida Arimaha Guddaha ee Wax-ka beddelka Xeerka booliska	Md. C/laahi Xusen Cige Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Gudaha ee GW.
22/12/2018	Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2019ka	Md. Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada
25/12/2018	Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha Golaha Wakiilada ee Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2019ka	Md. Cumar Axmed Saleebaan Sanweyne Gudoomiyaha Gudidda

### Xeerarka Madaxweynaha u gudbey ee dhaqan-galay

No	Magacyada Xeerarka	Taariikhda	Loo Gudbiyay
1.	Xeerka Tamarta Korontada	05/05/2018	Madaxweynaha
2.	Xeerka Waxbarashada	23/07/2018	Madaxweynaha
3.	Xeerka Shirkadaha	24/07/2018	Madaxweynaha
4.	Xeerka Maaraynta Deegaanka	28/07/2018	Madaxweynaha
5.	Xeerka Kufsiga	29/07/2018	Madaxweynaha
6.	Xeerka Qandaraasyada	02/09/2018	Madaxweynaha
7.	Xeerka Kalluumaysiga	08/09/2018	Madaxweynaha
8.	Xeerka Ciidanka Illaalada Xeebaha	02/12/2018	Madaxweynaha
9.	Xeerka Maaraynta Qashinka iyo Fayadhowrka Magaalooyinka	02/12/2018	Madaxweynaha

### Xeerarka Goluhu Ansixiyay 2018kii ee Guurtida ku maqnaa

No	Xeerka	Taariikhda
1.	Wax ka badalka Xeerka Booliiska	01/12/2018

### Mooshinadii Golaha la-horkeenay Sanadkii 2018kii

No	Mooshinka	Tar. la keenay
1.	Mooshinkii Wax ka-badalka & kaabista Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka	20/03/2018
2.	Mooshin Haamaha Shidaalka oo Golaha la horkeenay	05/05/2018
3.	Mooshinkii Wax ka-badalka & kaabista Xeerka Kaluumaysiga	07/05/2018

## Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay



Wasiirka Waxbarashada iyo laba xubnood oo Komishanka X.Insaanka ka tirsan oo Masuuliyiintii la ansixiyay ka mid ah

No	Taariikhda	Magaca	Xilka Masuulka	Tirada Codka lagu ansixiyey
1.	02/04/2018	Md. Sacad Cali Shire	Wasiirka Wasaarada Arimaha Dibada	Ogol= 41 Diiday= 2 Amus=2
2.	02/04/2018	Md. Cawaale Ibraahim Shirwac	Wasiirka W. Qorshaynta Qaranka	Ogol= 43 Diiday= 1 Amus=0
3.	08/04/2018	Md. Axmed Yuusuf Dirir	Hanti-dhawraha Qaranka	Ogol= 41 Diiday= 2 Amus=2
4.	30/07/2018	Maxamed Baaruud Cali	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 46 Diiday= 0 Amus=1
5.	30/07/2018	Rooda Axmed Yaasiin	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 47 Diiday= 0 Amus=0
6.	30/07/2018	Muuse Cismaan Warsame	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 47 Diiday= 0 Amus=0
7.	30/07/2018	Saleebaan Warsame Guuleed	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=0
8.	30/07/2018	Waris Abshir X. Diiriye	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=0
9.	30/07/2018	Cumar Maxamuud Xusseen	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=0
10.	30/07/2018	Cabdirashiid Siciid Cindi	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	Ogol= 47 Diiday= 0 Amus=1
11.	11/11/2018	Axmed Jaamac Maxamuud	Komishanka Maamul Wanaaga	Ogol= 35 Diiday= 5 Amus=4
12.	11/11/2018	Cabdiqaadi X. Ismaaciil Maxamed	Komishanka Maamul Wanaaga	Ogol= 35 Diiday= 5 Amus=4
13.	11/11/2018	Maxamed Axmed Cawaale	Komishanka Maamul Wanaaga	Ogol= 35 Diiday= 6 Amus=8
14.	11/11/2018	Liibaan Ismaaciil Cabdilaahi	Komishanka Maamul Wanaaga	Ogol= 34 Diiday= 5 Amus=8
15.	11/11/2018	Dayib Aadan X.Cali	Komishanka Maamul Wanaaga	Ogol= 39 Diiday= 5 Amus=3
16.	12/11/2018	Muuse Xassan Yuusuf	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=2
17.	12/11/2018	Faysal Maxamed Siciid	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=2
18.	12/11/2018	Cali Sh. Maxamuud	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 48 Diiday= 0 Amus=2
19.	12/11/2018	Xassan Maxamuud Maxamed	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 49 Diiday= 0 Amus=1
20.	15/12/2018	Mr. Maxamed Ismaaciil dhinbiil	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 50 Diiday= 0 Amus=0
21.	15/12/2018	Md. Amaal Cabdi Xasan	Gudidda H. Dhowrista Tayada (CCC)	Ogol= 50 Diiday= 0 Amus=0
22.	15/12/2018	Md. Cismaan jaamac Aadan,	Wasiirka Waxbarashada	Ogol= 50 Diiday= 0 Amus=0

## Go'aankii Ansixinta Heshiiska Saami qeybsiga Dekada Berbera

Wuxuu Golaha Wakiiladu Ansixiyay heshiiskii saami-qaybsiga maalgashiga Dekada Berbera ee dhexmaray Somaliland, Shirkada DP World iyo Dalka Itoobiya, sidoo kale Goluhu wuxuu cambaareeya go'aankii Baarlamanka federaalka Somalia ee iyagoo sheegnaya Dalka Somaliland ay kaga mamnuuceen shirkadda DP World ee dalka Imaaraatka Carabtu inay maalgashadaad Somaliland.

Go'aankan Golaha Wakiiladu uu soo saaray **12/03/2018** fadhi uu yeeshay ayuu cod aqlabiy ah oo dhan 54 (afar iyo konton mudane) ku ansixiyay go'aamadan:-



1. Madax-banaanida, Midnimada iyo Xuduudaha Jamhuuriyada Somaliland waa lama taabtaan.
2. Golaha Wakiillada Somaliland wuxuu cabaaraynayaa go'aanka gardarada ahaa ee Golaha shacabka ee dawlada somaliya ka soo saaray dekadda Berbera, sidoo kale wuxuu Goluhu si xoogan u cabaaraynayaa faragalinta qaawan ee ay dawlada somaliya ku hayso madax-banaanida iyo qaranimada jamhuuriyada Somaliland.
3. Goluhu isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah ayiday maalgashiga kheyraadka dabiiciga ah iyo kaabayaasha dhaqaalaha si kaabayaasha dhaqaale ee dalka si loo xoojiyo kobcinta dhaqaalaha, shaqo abuurista iyo nololshaha bulshada guud ahaan
4. Goluhu wuxu mar labaad taageeray ansixinta uu 9kii bishii | Augusta 2016 cod aqlabiyad ah (69 cod) ku meel mariyay heshiiska maalgashiga Dekada Berbera isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah.
5. Golaha waxaa uu go'aamiyay in cid walba oo ka qeyb qaadata ama taageerta ama si uun gacan u siisa xukuumadda Soomaaliya dhaq-dhaqaayada lidka ku ah jiritaanka iyo madaxbannaanida Somaliland loo aqoonsado cadaw qaran.
6. Goluhu wuxu Ururka Qaramada Midoobey, Midowga Afrika, Jaamacadda Carabta, IGAD, Dawladaha Jamhuuriyada Somaliland ka taageera horumarka iyo dimoqoraadiyadda u caddeynayaa in dhaq-dhaaqyada Soomaaliya ka waddo geeska Afrika kuwa keenni kara xasilooni darro, balse Jamhuuriyada Somaliland mar kale Dunida u Cadaynayso inay mabd'ahaan aaminsantahay, loona baahan yahay in si wada jir ah loo ilaaliyo nabad ku wada noolaanshaha, istixgalinta iyo xuquuqda aayo ka tashiga.
7. Goluhu wuxu ugu baaqay dhammaan muwaadiniinta Somaliland inay si buuxda isu garabtaagaan golayaasha qaranka iyo ciidamada dalka ilaalinta madaxbannaanida, sharafta iyo midnimada dad ahaaneed iyo dhul ahaaneed ee jamhuuriyadda Somaliland.

### **Fadhi Wada jir ah iyo Khudbad Sannadeedka Dastuuriga ah ee Madaxweynaha**

**25/03/2018** Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Muuse Biixi Cabdi** oo la doortay dhamaadkii Sanadkii hore ee Bishii November 2018 wuxuu markii ugu horaysay ka hor akhriyay khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha oo ah Dastuuri sanadkasta bilowgiisa uu Baarlamaan (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada) ka akhriyo fadhi wada jir ah oo ka qabsoomay Aqalka Golaha Guurtida.



*Madaxweynaha JSL Md. Muuse B. Cabdi oo Khudbad Sanadeedkii 2018ka Labada Gole (Baarlamaanka) ka hor akhriyaya*

Hadaba, Khudbada Madaxweynuhu ka hor akhriyay Golayaasha wuxu kaga hadlay arrimo badan oo ku saabsan Siyaasada Arrimaha Gudaha iyo Arrimaha Dibada iyo sidoo kale qorshayaasha Xukuumada. Waxaana ka mid ahaa waxyaabaha ay ka koobnayd khudbado arrimahan hoose:-

- Amniga
- Siyaasadda Arrimaha Dibedda
- Dhaqaalaha iyo Horumarka
- Kaabayaasha Dhaqaalaha
- Arrimaha Bulshada
- Maamul-wanaagga iyo Maamul-daadejinta
- Garsoorka iyo Cadaaladda
- Abaaraha iyo Isbeddelka Cimillada
- Doorashooyinka iyo
- Warbaahinta

## **Ansixintii Miisaaniyadaha Sanadaha 2018 iyo 2019ka**

### **Ansixintii Odooroska Miisaaniyada Sanadkii 2018ka**

Golaha Wakiilada Waxa la horkeenay Odooroska Miisaaniyada Qaranka 2018ka 01/04/2018 waxana Warbixin iyo Faah-faahin ka siiyay Golaha Miisaaniyadaas Wasiirka Horumarinta Maaliyada **Md. Yuusuf Maxamed Cabdi** isla maalintaas, intaas ka dib sida hab-raaca sharci dhigayo waxa lagu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha si ay waajibaadkeeda uga soo gudato Golahana ugaga soo Warbixiso Miisaaniyadaas.

Markii Gudidda Dhaqaaluhu soo naaqishtay isla markaana wixii ay su'aalo iyo cadaymo u baahnayd ka soo waydiisay cidii ay khusaysay waxay Warbixinteedii ku soo celisay Golaha 07/04/2018. Intaas ka dib wuxu Goluhu fadhi loogu yeedhay Wasiirka Maaliyada ay Mudanayaashu su'aalo badan ka waydiiyeen Miisaaniyada Wasiirkuna Golaha uga jawaabay, fadhigii xigayna Mudanayaashu dood laba cisho socotay ka yeesheen Miisaaniyada.



*Wasiirkii Wasaarada H. Maaliyada Md. Yuusuf M.Cabdi oo Warbixintii Miisaaniyada 2018kii Golaha ka akhriyaya*

Miisaaniyaddan oo ka badnayd 9% (Boqolkiiba Sagaal) Miisaaniyaddi 2017kii, taas oo Guud ahaan ku talo galka Dakhliga ee Miisaaniyadda 2018uu ahaa **2,218,782,985,769** SI Shilling. Intaas ka dib, taariikhdu markay ahayd 08/04/2018 waxa Golaha Wakiiladu ku ansixiyay Odoroska Miisaaniyada sanadka 2018ka fadhi uu yeeshay kaas oo ay ka soo xadireen 50 Mudane, waxay 47 Xildhibaan ay u codeeyeen in Miisaaniyadda la ansixiyo, Laba Mudane ayaa diiday, hal mudanena wuu ka aamusay, sidaas ayaanay ku Ansaxday Odoroskii Miisaaniyadda Sanadka 2018ku.

### **Ansixintii Odoroska Miisaaniyadda Sanadka 2019ka**

**22 December** 2018kii waxa Golaha Wakiilada la horkeenay odoroska Miisaaniyada Qaranka ee sanadkii 2019, Waxana Warbixinta Miisaaniyadaas ka hor akhriyay Golaha Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Dr. Sacad Cali Shire** oo Guud ahaan uga warbixiyay Xildhibaanada waxa ay ku saabsantahay miisaaniyaddu iyo meelaha xooga la saarayo sanadka soo socda.

Wasiirku waxa uu sheegay in ugu horayn qaybaha Miisaaniyadu ay ka kooban tahay:-

- Miisaaniyadda Dawladda Dhexe,
- Miisaaniyadda Hayadaha Madaxa banaan ee Dawladda ,
- Miisaaniyadda Dawladaha Hoose,
- Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeqbixiyeyaashu (Somaliland Development fund).

Isugeynta guud ee miisaaniyadda sannadka 2019ku waa **2,334,320,463,251** sida ka muuqata shaxda hoose. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **1,823,975,720,000 SLSH**, taas oo ka badan tii hore (Miisaaniyaddii 2018kii) **136,975,720,000 SLSH** oo u dhiganta 8%.

### **Dakhliga Miisaaniyadda 2019**

<b>Magaca</b>	<b>2018</b>	<b>2019</b>	<b>Faraqa</b>
Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	1,687,000,000,000	1,823,975,720,000	136,975,720,000
Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa Banaan	115,504,536,652	160,756,179,150	45,251,642,498
Miisaaniyadda Dawladaha Hoose	284,419,791,039	255,490,228,023	-28,929,563,016
Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta	79,598,658,078	79,598,658,078	0
Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Aduunka	45,704,269,080	0	-45,704,269,080
Miisaaniyadda Mashruuca JPLG	52,260,000,000	14,499,678,000	-37,760,322,000
<b>Total</b>	<b>2,264,487,254,849</b>	<b>2,334,320,463,251</b>	<b>69,833,208,402</b>

**Source** Buuga Miisaaniyada 2019ka





*Wasiirka W. Maaliyada Md Dr. Sacad Cali Shire oo Golaha u jeedinaya Warbixintii Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2019ka*

Sida oo kale waxa uu ka hadlay Wasiirku siyaasada Miisaaniyadda sanadka 2019. Isagoo sheegay in Siyaasada Miisaaniyadani ay si cad u tilmaamayso bartilmaameedka qoondaynta miisaaniyadda 2019, taas oo ku salaysan qorshaha horumarinta qaranka ee labaad (**NDPII**) iyo siyaasada balanqaadkii xisbiga Kulmiye ee talada dalka haya, waxana ka mida qodobada mudnaanta iyo ahmiyada ay siinayso Miisaaniyadda sanadka 2019:-

1. Amniga
2. Xoojinta Tayeynta Garsoorka
3. Waxbarashada, Biyaha & Caafimaadka
4. Xoolaha, Kalluunka & Beeraha
5. Aqoonsi Raadiska
6. Doorashooyinka
7. Kaabayaasha Dhaqaalaha
8. Tamarta & Macdanta
9. Deegaanka & iyo ka-hortaga Aafooyinka
10. Daryeelka Shaqaalaha
11. Xog ururinta

Intaas ka dib, waxa isla Maalintaas Miisaaniyadda lagu wareejiyay Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada. Waxay Guddida Dhaqaaluhu Warabixintooda ku saaabsan Miisaaniyadda Golaha ka hor jeediyeen **22 December**, isla fadhigaas ayay Mudaanayaasha Goluhu dood ka yeesheen Miisaaniyadda, dooddaas oo socotay malaintaas kaliya.

Ugu dambeyn, **29kii bisha December, 2018** ayaa Goluhu Ansixiyay Miisaaniyadda sanadka 2019, iyadoo la raaciyay Soo jeedintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha u soo jeedisay. Fadhigaas oo ay ka soo xaadireen **60 Xildhibaan**, waxa ansixinta Miisaaniyadda cod gacan taag ah ku ogolaaday 46 Mudane, halka 12 Mudane ka diideen, hal mudane uu ka aamusay, Sidaasna Wuxuu Golaha Wakiiladdu ku ansaxday Odoroska Miisaaniyadda Qaranka ee Sanadka 2019ka oo lagu ansixiyay soo jeedinta Guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada JSL.

## Xeerarka Qabyada ah ee Golaha horyaal

### Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan

No.	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
3.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
4.	Xeerka Macdanta	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
5.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
6.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud iyo D/galinta	Gudidda Arrimaha Gudaha
8.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
10.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
11.	Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
12.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka	Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
13.	Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka	Gudidda Arrimaha Gudaha
14.	Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada	Gudidda Arrimaha Gudaha
15.	Xeerka Maydhista Lacagta	Gudidda Dhaqaalaha

Source Ajandaha Kal-fadhigii 38aad

### Go'aanada Goluhu Gaadhey Sanadkii 2018ka

Shaxdan hoose waxa lagu soo koobay dhamaan go'aamadii Goluhu gaadhay sanadkii 2018ka, go'aamadaas oo isugu jira Ansixinta Mashaariic Sharci oo Xukuumadu soo gudbisay, Masuuliyiin Qaran iyo go'aame kale oo muhiima kuwaas oo Goluhu coddad aqlabiyad ah ku meel-mariyay.

Hadaba, Shaxdan hoose waxay ka kooban tahay go'aamadii oo u kala sareeya siday u kala horeeyeen, taariikhda go'aan kasta la gaadhay iyo halka go'aankaasi u gudbay, sida Xeerarka labada Madaxweynaha u gudbay, Xeerarka Guurtida u gudbay iyo qaraarada kale ee heer qaran.

No.	Go'aanada Goluhu Gaadhay	Tar. go'aanka	U gudbay
1.	Go'aanka Ansixinta Xubin Guddida Cadaaladda	21/01/2018	Madaxweynaha
2.	Go'aanka Ansixinta Xubin Guddida Cadaaladda	21/01/2018	Madaxweynaha
3.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guryaynta	13/01/2018	Madaxweynaha
4.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Horumarinta-Maalgashiga	14/01/2018	Madaxweynaha
5.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Arimaha Gudaha	15/01/2018	Madaxweynaha
6.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Cadaalada	15/01/2018	Madaxweynaha
7.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Horumarinta Caafimaadka.	13/01/2018	Madaxweynaha

8.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Horumarinta Biyaha	13/01/2018	Madaxweynaha
9.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Horumarinta Beeraha	13/01/2018	Madaxweynaha
10.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Horumarinta Maaliyada	13/01/2018	Madaxweynaha
11.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta kaluumaysiga.	13/01/2018	Madaxweynaha
12.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Diinta iyo Awqaafta	13/01/2018	Madaxweynaha
13.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaaraha	14/01/2081	Madaxweynaha
14.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Gaadiidka iyo horumarinta Jidadka	14/01/2018	Madaxweynaha
15.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Macdanta iyo Tamarta	14/01/2018	Madaxweynaha
16.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Xidhiidhka Golayaasha iyo Arimaha Dastuurka	14/01/2018	Madaxweynaha
17.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer-miyiga	14/01/2018	Madaxweynaha
18.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Isgaadhsiinta Iyo tignoolajiyada	13/01/2018	Madaxweynaha
19.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska	14/01/2018	Madaxweynaha
20.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska	13/01/2018	Madaxweynaha
21.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada warfaafinta, wacyigalinta iyo Dhaqanka	14/01/2018	Madaxweynaha
22.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Horumarinta Maaliyada	14/01/2018	Madaxweynaha
23.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	15/01/2018	Madaxweynaha
24.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo horumarinta Kaluumaysiga	15/01/2018	Madaxweynaha
25.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Warfafinta, wacyigalinta iyo dhaqanka.	13/01/2018	Madaxweynaha
26.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada waxbarashada iyo Sayniska	15/01/2018	Madaxweynaha
27.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Arimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah	15/01/2018	Madaxweynaha
28.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.	15/01/2018	Madaxweynaha
29.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Arimaha Gudaha	14/01/2018	Madaxweynaha
30.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka Wasaarada Horumarinta Caafimaadka	15/01/2018	Madaxweynaha
31.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Gaashaamdhiga	14/01/2018	Madaxweynaha

32.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Kufsiga iyo xadgudubyada Jinsiga Xr.Lr 78/2017	06/01/2018	Guurtida
33.	Go'aanka Ansixinta Xeerka waxbarashada Xr.Lr 77/2017	02/01/2018	Guurtida
34.	Go'aanka Golaha Wakiilada ee taageeridda Heshiiska Somaliland, Ethiopia iyo Dpworld	13/03/2018	Madaxweynaha
35.	Go'aanka Golaha Wakiilada ee Diidmada Faragalinta Maamulka muqdisho ku hayo Hawada Jsl Iyo heshiisyada ay gasho.	02/04/2018	Xukuumada
36.	Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Qaranka ee 2018-ka	08/04/2018	Madaxweynaha
37.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Tamarta iyo Korontada Xr.Lr 81/2018	21/04/2018	Guurtida
38.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Qandaraasyada Qaranka Xr.Lr 82/2018	21/04/2018	Guurtida
39.	Go'aanka Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 37 <sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.	14/07/2018	Shirgudoonka Golaha Wakiilada
40.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Tamarta iyo Korontada Xr.Lr 81/2018	05/05/2018	Madaxweynaha
41.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Rooda Axmed Yaasin	30/07/2018	Madaxweynaha
42.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Muuse Cismaan Warsame	30/07/2018	Madaxweynaha
43.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Sal;eebaan Warsame Guuleed	30/07/2018	Madaxweynaha
44.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Waris Abshir x. Diiriye	30/07/2018	Madaxweynaha
45.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Cumar Maxamuud Xeseen	30/07/2018	Madaxweynaha
46.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Maxamed Baaruud Cali	30/07/2018	Madaxweynaha
47.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka, Cabdirashiid siciid Cindi	30/07/2018	Madaxweynaha
48.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka,	30/07/2018	Madaxweynaha
49.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Waxbarashada Xr.Lr 77/2018	07/04/2018	Madaxweynaha
50.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Deegaanka Xr.Lr 79/2018	28/04/2018	Madaxweynaha
51.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Shirkadaha Somaliland Xr.Lr 80/2018	23/04/2018	Madaxweynaha

52.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Kufsigu iyo Xadgudubyada Jinsiga Xr.Lr 78/2018	22/01/2018	Madaxweynaha
53.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Maaraynta Qashinka Xr.Lr 83/2018	11/08/2018	Guurtida
54.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Kaluumaysiga Xr.Lr 78/2018	27/08/2018	Guurtida
55.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Xr.Lr 85/2018	28/08/2018	Guurtida
56.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Qandaraasyada Qaranka Xr.Lr 82/2018	11/08/2018	Madaxweynaha
57.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Kaluumaysiga Xr.Lr 78/2018	08/09/2018	Madaxweynaha
58.	Go'aanka Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 38aad ee Golaha wakiilada	29/10/2018	Shirgudoonka
59.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Maamulwanaaga, Cabdiqaadir Ismaaciil Maxamed	11/11/2018	Madaxweynaha
60.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Maamulwanaaga, Liibaan Ismaaciil Cabdilaahi	11/11/2018	Madaxweynaha
61.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Maamulwanaaga, Axmed Jaamac Maxamuud	11/11/2018	Madaxweynaha
62.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Maamulwanaaga, Dayib Aadan Cali	11/11/2018	Madaxweynaha
63.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Komishanka Maamulwanaaga, Maxamed Axmed Cawaale	11/11/2018	Madaxweynaha
64.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada, Xasan Maxamuud Maxamed	11/11/2018	Madaxweynaha
65.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada, Faysal Maxamuud Siciid	12/11/2018	Madaxweynaha
66.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada, Muuse Xassan Yuusuf	12/11/2018	Madaxweynaha
67.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada Cali Sh. Maxamuud	12/11/2018	Madaxweynaha
68.	Go'aanka Ansixinta Wax-ka-beddelka Iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliska	01/12/2018	Guurtida
69.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Maaraynta Qashinka iyo fayd dhawrka Magaalooyinka Somaliland.	02/12/2018	Madaxweynaha
70.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha X. Lr. 85/2018	02/12/2018	Madaxweynaha
71.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada, Maxamed Ismaaciil Dhinbiil (suufi)	15/12/2018	Madaxweynaha
72.	Go'aanka Ansixinta Xubin Ka mid ah xubnaha Hay'ada Dhawrista Tayada, Aamaal Cabdi Xasan	15/12/2018	Madaxweynaha



73.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska	15/12/2018	Madaxweynaha
74.	Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Qaranka ee 2019-ka	29/12/2018	Madaxweynaha

Source: Diiwaanka go'amada ee Xafiiska Xusuus Dhowrka C/wakilada

## Waxqabadka Guddiyada Golaha Sanadkii 2018kii

Gudiyadda Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan Golaha waxayna guddi walliba Golaha u qaabilsan tahay shaqooyin gaar ah.

Sidaa darteed, waxay Guddiyaddu Golaha uga soo warbixiyaan dhamaan Masuuliyiinta la ansixinayo ee ay Xukuumadu u magacawdo Wasaaradaha iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxay ka soo shaqeeyaan Xeerarka qabyada ah markay marayaan heerka gudidda (committee stage), sidoo kale waxay Guddiyaddu la xisaabtamaan hay'addaha Xukuumada intay guddi walba qaabilsan tahay iyagoo matalaya Golewaynaha. Hadaba waxa halkan idinku soo gudbinaynaa tiradda Guddiyadda wax-qabadkoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Gudidda Sirdoonka iyo Nabadsugida.
9. Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu u xil saaran tahay inay hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Guddida Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda sharci ee xil-gudashada hawlaha qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaani ee Dawlada.

Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino, kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

N	Meelaha ay la kulmeen	Wakhtiga kulanka
1.	Gudoomiyaha Baanka Dhexe	29/05/2018
2.	Maareyaha Hay. ka-hortaga Aafooyinka Dabiiciga & K. Raashina	20/06/2018
3.	Hanti-Dhawraha Guud ee Qaranka	25/06/2018
4.	Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada	24/09/2018

5.	Wasiirka Horumarinta Beeraha	25/09/2028
6.	Wasiirka Wasaarada Shaqo-Galinta, Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska	06/10/2018
7.	8. Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada	06/10/2018

Bishii October 2018kii Gudidda Joogtadu waxay Kormeer ugu Baxday Gobolka Saaxil Magaalo Madaxdiisa Berbera, safarkaas oo ujeeddiisu ahayd inay xog ka helaan sida ay Dekada Berbera u shaqayso tan iyo intii DP World la wareegtay, sidoo kale xog-ogaal u noqoshada xaaladda Haamaha Shidaalka oo laga wareejiyay ganacsatadii gacanta ku haysay wixii iska badalay shaqadeedii iyo halka maamulka Cusub wax u marayaan iyo guud ahaanba Xaalada Gobolka Saaxil, Waxayna Guddidu la Kulantay intii ay safarka ku jirtay Masuuliyiintan:-

- Badhasaabka Gobolka Saaxil **13/10/2018**
- Maayorka Berbera **13/10/2018**
- Maareeyaha Dekeda Berbera **14/10/2018**
- Maareeyaha Haamaha Shidaalka ee Berbera **15/10/2018**

### **Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.**

Gudidda Dhaqaaluhu Sanadkii 2018kii intii lagu jiray waxyaabihii u qabsoomay waxaa ka mid ahaa kulamo ay Masuuliyiin kala duwan la yeelatay iyo safaro ay baxday. Waxqabadkeeduna wuxu kala ahaa sidan:-

- **03/04/2018** waxay kulamo kala duwan la yeesheen Wasiirka iyo Saraakiisha sare sare ee Wasaarada Horumarinta Maaliyada kulankaas oo Gudiddu wax kaga waydiinaysay Miisaaniyada 2018ka oo Gudiddu markaas Gacanta ku haysay.
- **07/04/2018** Waxay Gudiddu Golaha uga soo talo bixisay Warbixina uga soo gudbisay Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2018kii.
- **19 July 2018** Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha wakiilada JSL ayaa Kulan Xogwaraysi ah la yeeshay Maareeyaha Wakaallada Biyaha Hargeysa **Md. Maxamed Cali Daarood** oo ay wehelinayaan Madaxda kala duwan ee wakaalada biyaha Hargeysa. Maaryeaha ayaa Gudida uga xog waramay Shaqada uu qaranka u hayo gaar ahaana mashaariicda la xidhiidha biyo-ballaadhinta Caasimada iyo sababta keentay in la kordhiyo qiimaha biyaha. Maareeyaha wakaalada biyaha iyo Gudida dhaqaalaha ayaa markii kulankoodu dhamaaday waxay si gaara kulan ula qaateen shirgudoonka Golaha wakiilada.



*Kulankii Gudidda iyo M. W. Biyaha Hargeysa*

*Kulankii Gudidda Dhaqaalaha iyo Wasiirka Maaliyada*

- **15/10/2018** Gudidda Dhaqaaluhu waxay kulan la qaadatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada **Md. Yuusuf Maxamed Cabdi**, kulankaas oo Gudidda Wasiirku kaga wada-hadlayeen arrimaha Miisaaniyada 2018ka halkay marayso iyo in Gudiddu kormeer ku tagaysay Illaha Dakhliga Gobolada Dalka. Sidoo kale waxay Gudidda Wasiirka ka wada hadleen Diyaarinta Miisaaniyada Sanad Maaliyadeedka 2019ka iyo halkay Wasaaradda u marayso.
- **22/10/2018** waxay Safar ku soo martay Illa dakhliga Gobolada Saaxil, Tog-dheer, Awdal iyo Degmada Gabilay, waxaysafarkaas ugu kuur galaysay sida hawlaha dakhli ururinta ee Kastamada iyo Cashuuraha Bariga ee Goboladaas u shaqaynayaan iyo inay dakhligii lagu odorosay Miisaaniyadda uu soo xeeroday iyo wax iska badalay odoroskii. Gudiddu Warbixinta Safarkaas iyo xogtay ka soo heleen waxay u soo gudbiyeen Golaha iyagoo sheegay in dhamaan Dakhliga dalku ku talagalkii si fiican u soo xeeroday isla markaana ay jiraan dheeraad dakhli marka loo eego odoroskii miisaaniyada 2018ka dakhligii lagu qoondeeyay.

### **Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.**

Gudidda Khayraadka Dabiiciga ah iyo Deegaanku Sanadkii 2018kii Waxay Golaha u soo Gudbisay Xeerarka kala ahaa:-

- Xeerka Fayadhowrka iyo Maaraynta Qashinka oo ay Warbixin ka siisay Golaha taariikhdu markay ahayd 23/04/2018.
- Xeerka Tamarta Korontada Taariikhdu markay ahayd 09/04/2018.
- Xeerka Maaraynta Qashinka iyo Faya-dhowrka Magaalooyinka

**03/04/2018** Waxa kulan wada yeeshay Guddida Degaanka iyo khayraadka Dabiiciga ee Golaha Wakiilada iyo Wasiirka Wasaaradda Hormarinta Beeraha **Md. Axmed Muunin Seed** kulankaas oo ka dhacay xafiiska Guddida ee Xarunta Golaha Wakiilada, ujeeddada kulanku waxay ahayd xog-ogaal u noqosho xaaldaha shaqo ee Wasaaradda Hormarinta Beeraha.

**19 September 2018** Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah waxay kulan xogwaraysi la yeelatay Gudoomiyaha Hay'adda Dhowrista Tayada, ujeeddada kulanka oo ahaa in Gudiddu hay'addaas wax ka waydiiso shaqada ay qaranka u hayso isla markaana wax uga waydiiso wixii u qabsomay, baahiyahooda iyo hadii ay jiraan wax caqabado ah oo xaga fulinta shaqadooda ka haysta.

Gudoomiyaha Hay'addaas oo Gudidda Warbixin ka siiyay shaqadooda iyo baahiyaha ay qabaan wuxu Gudidda u sheegay in loo baahan yahay Laabab lagu baadho tayada oo ay codsadeen in sanad walba hal laab Miisaaniyada loogu daro, sidoo kale in la doono Laab wayn oo lacagtiisu qaali tahay, isla markaana Dawlad ahaan, Ganacsato iyo cidii inaga caawin kartaba laga wada qayb qaato sidoo lacagta Laabkaas wayn loo heli lahaa, sidoo kale wuxu Gudidda ka codsaday inay kala shaqeeyaan Xeerka Hay'adda Dhowrista Tayadda oo dhowaan la ansixiyay lagu sameeyo Wax ka badal iyo kaabis oo loo baahan yahay inuu noqdo xeer la jaanqaadi kara tayada loo baahan yahay shaqada Hay'adda u xilsaaran tahay.

**10 December 2018** Gudidda Deegaanku waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta ujeeddaa guud ee kulankaas dhexmaray Guddida iyo Wasaaradda Macdanta iyo Tamartu wuxuu daarnaa falanqaynta xeerarka Macdanta iyo Shidaalka oo Gudiddu gacanta ku hayso dalku baahiwayn u qabo in la ansixiyo Xeerarkaas.

Wasiirka Macdanta iyo Tamartu wuxu Gudidda u sheegay in Xeerarkaas aad loogu baahan yahay si khayraadka macdanta iyo shidaalka dalka loogaga faa'idaysto si sharciya loona helo sharci lagu dhaqo oo loo isticmalo, wuxuna Gudidda u tilmaamay in hadii aan sharci laga soo saarin nimcooyinkaas macdanta iyo shidaalka ay keenayso dhibaato gaadhi karto in la isku dillo. Ugu dambeyn wuxu Gudidda iyo guud ahaan Golayaasha Xeer-dejinta ka codsaday in wakhiga ugu haboon ee ugu dhakhsaha badan Xeerarkaas uga shaqeeyaan una meel mariyaan Sharciyayntooda.

**23/12/ 2018kii** Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxay kormeer ku tagtay Gobolka Saaxil gaar ahaan Deegaanka Ceel-baxay oo hoos yimaada Degmada Laasciidlay, kormeerkaas Gudiddu ku tagtay deegaanka Ceelbaxay ujeedadiisu waxay ahayd u kuur-galida iyo xog ka helida Macdan baadhis ay wadaan Shirkado Jayniis ah oo heshiis la galay Xukuumada Jamhuuriyada Somaliland, macdanta Deegaankaas laga guro waxay ka koobnayd saddex nooc oo kala.

1. Qaybta Koowaad ee Macdanta oo ah Black Check Macdanta black check waxay dadku siin jireen halka Tan \$1300 oo dollar.
2. Qaybta labaad ee Macdanta oo loo yaqaan Naadir Qaybta naadir waa qayb kamid ah Macdanta laga helo Magaalada Ceelbaxay qiimaha iyada lakala siistaa waxa weeye Halkii Tan waxaa la siistaa \$2500 oo Dollar.
3. Qaybta Saddexaad ee Macdanta waxa loo yaqaan Green Check qayta green check waxaa la kala siistaa halkii tan \$2400 oo Dollar.

Intii ay Gudiddu deegaankaas ku sugnayd waxay kulamo gaar-gaar ah la yeesheen dadka deegaankaas ku nool, sidoo kale Gudiddu waxay halkaas kula kulantay 5 xubnood oo ka tirsan Xildhibaanada Golaha Deegaanka Magaalada Barbera oo halkaas iyaguna u joogay khilaaf la sheegay inuu ka dhex qarxay dadka deegaankaas iyo shirkada Jayniiska, waxay gudiddu xogo kala duwan ka dhagaysatay bulshada deegaankaas iyo Xildhibaanada Golaha Deegaanka Barbera ka socday.

Labada dhinac ee dadka deegaanka iyo Xildhibaanada Golaha Deegaanku mid walba waxay Gudidda u sheegeen in Wasaarada Macdanta iyo Tamartu shirkadahaas heshiiska la gashay, wax bulshada deegaanka laga waydiiyayna aanay jirin heshiiskaas, iyadoo macdanta deegaanka laga gurayaa tahay mid noocyo badana aan la xadidin macdanta heshiiska lagula galay shirkadahaas oo aan wali bilaabin qodista macdantaas. Sidoo kale waxay codsadeen in loo soo diro dad khubaro ah oo wax ka yaqaan si loo ogaado dhibaata ay deegaanka u keeni karto iyo sidoo kale caafimaad ahaa hadii ay saamayn bulshada ku yeelan karto.

Waxayna ugu dambeyn xubnaha Golaha deegaanka Berbera ka tirsani Gudidda u sheegeen in loo baahan yahay intaan la bilaabin hawsha in la cadeeyo saami maxay ah baa dadka Degaanku ay ku leeyihiin? Maxaase ay Shirkadu leedahay? Maxaase Dawladu leedahay? Sidee loo Maamulayaa Saamiga Degaanku Leeyahay yaase Maamulaya? Dhamaantoodna Wasaarada Macdanta iyo Tamarta looga baahan yahay jawaabaha waydiimahaas inay cadayso.

20/12/2018kii Gudiddu waxay Safar shaqo ku tagtay Gobolka Awdal, gaar ahaan Degaanada, Baki, Ruqi, Sibsibta, Xamarta iyo Nawaaxiga Siimoodi. Ujeedada guud ee safarkaasi wuxuu ahaa Xog-ogaal u noqoshada goobaha macdaha laga baadho ee gobolka awdal, oo ay kamidyihiin Sibta iyo nawaaxiga Siimoodi iyadoo ujeedada saafarku ay ku qotontay aburida xeerka macdanta oo Gudiddu gacanta ku haysay aga samaynayay xog-ogaal unoqosho dhaba.

### **Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta**

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta oo ka mid ah 10ka Gudi-hoosaad ee Golaha, waxay kulamo xogwaraysi iyo wada-shaqayneed la yeelatay Wasaaradaha kala ah:-

- Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska **Md. Yaasin Maxamuud Xiir (Faratoon)** taariikhdu markay ahayd 03/04/2018.
- **Wasiirada Arrimaha Bulshada iyo shaqadaMd. Hinda Jaamac maxamed xirsi (Gaani)** taariikhdu markay ahayd 29/04/2018.

### **Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada**

Gudidu iyada oo gudanaysa Waajibaadkeeda sharci, waxay kulan xog waraysi ah la yeelatay taliyaha Ciidanka ilaalada xeebaha **Admiral Cabdi Xirsi Ducaale**, kulan kaas oo ku saabsanaa sidii gudidda iyo ciidanku uga wada shaqayn lahaayeen Qabyo qoraalka Xeerka Ilaalada Ciidanka Xeebaha oo ay gudidu gacanta ku hayso. Kulankaas ka dib gudiddu waxay qabatay kulan aqooneed hal maalin ah oo ay maalgalisay Hay'ada EUCAP, kulan aqooneedkaas oo laga hadlayay baahida xeerka kaas oo ay ka soo qayb galeen dhamaan daneeyayaasha xeerka oo ka mid ahaayeen:

- Wasaarada Arimaha Gudaha
- Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga
- Wasaarada Cadaalada
- Xeer-ilaalinta
- Laanta socdaalka
- Ciidanka Booliska
- Garyaqaanka Guud

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Difaacu waxay Golaha u soo gudbisay **Xeerka Ciidanka Illaalada Xeebaha**, markii ay ka soo shaqaysay Xeerkaas, isla markaa Warbixintii iyo wax ka badalkiisa ayuu Gudoomiyaha Gudiddu Golaha ka hor akhriyay, Xeerkaas oo ugu dambeyn Goluhu Ansixiyay.





*Gudidda Arr. Gudaha kulankii ay la yeelatay T. Ciidanka Qaranka iyo W. Gaashaandhiga*

**15/08/2017** Gudiddu waxa ay kulan la qaadartay Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka. Kulan ka oo ka dhacay Xafiiska Guddida. Kulankan oo ujeedadiisu ahayd xogwaraysi xaaldata nabadgalyo daro ee ka soo kordhay Bariga iyo dagaaladii ka dhacay Tuko Raq iyo dhexdhexaadintii laga waday beelihii sool dirirtu ku dhex martay. Sidoo kale kulanka waxa lagaga wada hadalay xeerka Hawlgalba Ciidanka iyo Xaqsiintooda ay dawladu soo gudbisay kaas oo gudiddu gacanta ku hayso sidi looga wada shaqayn lahaa. Gabagabadii kulankasi wxu ku soo dhamaday si wanaagsan Xogtii gudidu uga bahaanayd way ka heshay.

**21/10/2018** Gudidda Arrimaha Guddaha iyo Nabadgalyadu waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo taliyaha Ciidanka Boolisaka. Kulankaas oo ka qabsoomay Xafiiska Guddida ee Xarunta Golaha. Ujeedada Kulan oo ahayd is xog-waraysi ku aadan xaaldata nabadgalyada ee dalka iyo nabadayntii dagaaladii ka dhacay Ceel afwayn iyo laascaanod iyo siday u soo dhameeyeen. Sidoo kale kulanka waxa lagaga wada hadalay xeerar ay dawladu soo gudbisay oo gudidu hayso sidi looga wada shaqayn lahaa. Ugu danbayntii, kulankasi waxa u ku soo dhamaday si fiican Xogtii gudidu uga bahaanayd way ka heshay.

**Bishii November 2018kii** Gudidda Arrimaha Guduhu Waxay Golaha uga soo tallo-bixisay una soo gudbisay wax ka badalka Xeerka Booliiska oo Xukuumadu Golaha hore ugu soo gudbisay, Gudiddu ka dib markii ay kulamo kala duwan la yeelatahay daneeyayaasha Xeerka sida

Ciidamada Booliiska iyo Wasaarada Arrimaha Gudaha, Garyaqaanada dalka iyo Bulshada Rayidka ah waxay soo jeedisay in wax ka badal lagu sameeyo Qodobadii Xukuumadu soo jeedisay ay ku soo samaysay, waxayna Soo jeedinteeda Golaha u soo gudbisay **13/11/2018**.

### **Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka**

Guddidan Illaalinta Iyo Daba-galka Hantida Qaranku iyagoo dar-dar-glinaya hawlaha Golaha u igmaday Waxay:-

- Kulan Xogwarysi la yeelatay Maareeyaha Hay'adda Duulista iyo Madaarada **Duuliye Sare Cabdi Maxamed Rodal**

Sidoo kale Waxay Gudiddu laba Warbixinood ka siiyeen Golaha:-

- Safar ay Gudiddu ku tagtay Dalka Tansaaniya oo ku saabsanaa Xeerka Qandarasyada, iyagoo safarkaas Golaha Warbixin ka siyeen 19/03/2018.
- Warbixinta Xeerka Qandaraasyada Qaranka oo ay Golaha u soo gudbiyeen 21/04/2018.

Waxa kale oo ay Gudiddu Golaha uga soo tala-bixisay Ansixinta:-

- Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka **Md. Axmed Yuusuf Dirir** 07/05/2018

### **Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Q. Qaranka**

Gudida Arrimaha Dibadu 02/04/2018 waxay Golaha tala-bixin ka soo siiyeen Ansixinta Labada Masuul ee Kala ah:-

- Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah **Dr. Sacad Cali Shire**.
- Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka **Md. Cawaale Ibraahim Shirwac**

### **Gudidda Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka**

**Bishii July 2018**, Gudidda Garsoorka, Cadaaladda iyo Xuquuqal Insaanku waxay Golaha uga soo tallo-bixisay Ansixinta **Xubnaha Gudidda Xuquuqal Insaanka** oo 7 Xubnood ahaa kuwaas oo Goluhu markii dambe ansixiyay 30/07/2018.

### **Mudanayaasha Golaha oo saxeexay dala (petition) Ictiraaf Raadin ah**

Waxa **08/09/2018** Mudanayaasha Golaha la horkeenay dalab (Petition) lagu taageerayo Aqoonsiga iyo Gooni isu taaga Somaliland kaas oo Xildhibaanada Goluhu wada saxeexeen, petition-kaas oo loo dirayay Ururada Dawliga Sida Qaramada Midoobay, Ururka Midawga Afrika, IGAD, Jaamacada Carabta iyo Dawladaha daneeya qadiyada Somaliland, waxa petition-kaas lagu muujinayay sida Somaliland caalamka uga doonayso aqoonsi buuxa oo ay hesho isla markaana ay uga go'an tahay gooni isutaagu oo ay somaliya ka go'day 1991kii.



Petition-kaas oo Mudanayaasha Golaha Wakiiladu dhamaantood saxeexeen ayaa Shir-gudoonka Goluhu wuxuu si rasmiya ugu gudbiyay dhamaan Ururada iyo Dawladaha kala duwan ee ay

## **Horumarinta iyo Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Maammulka Golaha**

### **Wax-qabadkii Waaxda Cilmi-baadhista iyo ITga.**

Waaxda Cilmi-baadhista iyo ITga u qaabilsan Golaha Wakiilada waxay sanadkii 2018kii samaysay ama u qabasoomay waxyaabo ay ka mid yihiin Cilm-baadhis ay ku samaysay Xeerka Nidaamka Garsoorka, Hadaba waaxdu waxyaalaha ay qabatay sanadkii ina dhaafay ee 2018kii waxaa ka mid ahaa waxyaalahan soo socda:-

#### **Qaybta Cilmi-baadhis (Research).**

Waaxda Cilmi-baadhista iyo ITga ee Golaha Wakiiladu waxay 22 April 2018kii Cilmi baadhis (Research) ku samaysay Xeerka Nidaamka Garsoorka taas oo Ujeedada laga lahaa cilmi-baadhistaasi ahayd maadaama xiligii Xeerkan la ansixiyay ay ka soo wareegtay mudo dheer loogu dhaqmay sidii loogu talagalay iyo hadii ay jiraan caqabado ama baahi Xeerka kaabis ama wax ka badal inay jirto, qodobadda laga doonayay in la ogaadona waxay ahayd:-

- In la ogaado sida uu u dhaqan galay xeerku
- In uu wax ka taray baahiyihii loo sameeyay
- In ay jiraan wax caqabado ah oo lagala kulmay xeerka
- In ay jirto baahi loo qabo in wax laga badalo meelaha qaar

Cilmi-baadhistan waxa ka soo baxay oo lagu ogaaday dhowr qodob oo ka soo baxay cilmi-baadhistan kuwas oo kala ahaa:-

- In ay jiraan laba nuqul oo Xeerar ah oo la yidhaahdo Xeerka Nidaamka Garsoorka, iyadoo labada nuqul ay labaduba ku soo baxeen digreeto madaxwayne oo la saxeexay Xiligii Madaxwayne Daahir Riyaale kaahin arintan oo Garsoorka ku ah caqabad aan laga gudbi Karin oo looga baahanyahay golaha Wakiilada inay wax ka qabtaan oo ay ka gaadhaan xal xeerkaas.

- In sida uu dhigayo xeerka Nidaamka Garsoorku sanad walba la qabto shirwayne balaadhan oo Garsoor sida uu dhigayo Qodobka 56aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorku, oo ay kasoo qayb galaan dhinacyo farabadan laguna falanqeeyo arimaha Garsoorka taas oo iyadana aan loo raacin sida uu xeerku dhigayo oo hal mar 2010 laqabtay.
- In maxkamadaha Degmooyinku sida uu dhigayo Xeerka Nidaamka Garsoorku qodobkiisa 6aad faqrada 4aad oo sheegasa in maxkamada Degmadu yeelanso laan u gaara dacwadaha ciqaabta Caruurta. Taas oo hada Maxkamadaha Degmadu aanay lahayn qayb u gaara ah dacwadaha Caruurta.
- In lagu soo daro dadkii la waraystayna ay kawada dhawaajiyeen ayaa ay tahay in Xeerkani aanu wax xuquuq ah siinayn dadka ka shaqeeya Garsoorka taas oo dhiiri galin u noqon karta isbadal wanaagsan oo ku yimaada garsoorka
- In sida uu xeerku dhigayo qodobkiisa 53aad faqrada 6aad oo sheegaysa hawlaha garyaqaanka guud oo ay ka mid tahay inuu diwaangeliyo hantida maguurtada ah ee qaranka aanu hawshaa qaban.

Ugu dambeyn Xafiiska Cilmi-baadhista ee Waaxda Cilmi-baadhita iyo ITga Golaha Wakiiladu wuxuu soo jeediyay markuu arkay waxyaabaha lagu ogaaday Cilmi-baadhistan qodobadan soo socda:-

1. In Guddida Cadaalada iyo Garsoorka iyo Xuquuqal Insaanku ay daba gal ku samayso waxyaalaha kasoo baxay Cilmi-baadhistan, isla markaana ay su'aalo ka waydiiso cida ay khusayso iyo sababaha ay u fuliwaayeen
2. In Guddidu wax ka qabato caqabada ugu wayn ee Xeerkan ka hor taagan oo ah in laba Xeer ay is garab socdaan
3. In wax laga qabto cabashada Garsoorka ee ah in Xeerkani uunu u qeexayn wax xuquuq ah.

#### Qaybta IT ga

- Dhinaca IT ga waxa ay waaxdu qabatay inay samaysay (website) casri ah oo dhamaystiran isla markaana muuqaal ahaan iyo qaab ahaanba aad uga sareeya website kii hore.
- Waxa kale oo ay waaxdu qabatay in ay database u samaysay waaxda Protocol ka iyo security-ga
- Waxa kale oo ay waaxdu database u samaysay Waaxda Xusuus Dhowrka
- Waxa ay waaxdu kor u qaadis (promotion) ku samaysay page ka facebook-ga Golaha wakiilada
- Waxa ay waaxdu hawl joogto ah ka haysaa habsami u shaqaynta qalabka It-ga ee dhamaan Goluhu isticmaalo, hadii ay tahay computers, ka printerska, ka warhaynta internet ka iyo kasaarista wixii cilad ah ee lasoo gudboonaada.

#### **Hay'adda UNDP oo Laybareeriga Baarlamaanka ugu deeqaday.**

**23 January 2018**, waxay Hay'adda UNDP oo Golaha la shaqaysaa ku Caawisay tiradoodu dhan tahay 223 Buug Maktabada (Library) Baarlamaanka. Buugtaas oo ahaa kuwo isugu jiray Buugaag Siyaasadeed, Sharci iyo Taariikh Baarlamaanku aad baahi wayn ugu qabay, isla markaana u



noqday kaydii koowaad ee Buugaagta Maktabada Baarlamaanka oo iyada lafteedu ah mid cusub oo sanadkii 2017kii la furay, Maktabadu waxay Mudanayaasha iyo Hawl-wadeenada Golayaasha Xeer-dejinta ka caawinaysaa xaga aqoonta, Cilmi-baadhista iyo ogaanshaha hadba wixii ay xog uga baahdaan.



*Buug Tiradoodu tahay 223 Guud oo Hay'adda UNDP ugu deeqday Laybareeriga Baarlamaanka*

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax oo goob joog ahaa Xafladii wareejinta Buugtaas ayaa aad ugu mahadnaqay Hay'adda UNDP. Gudoomiyuhu wuxu sheegay in buugtaasi Maktabada wax ku soo kordhinayaan laakiin baahidii Buugta ee Maktabadu aanay wali fari ka qodnayd loona baahan yahay buugaag iyo macluumaad badan oo dalka iyo dibada ah la dhigo Maktabadan.

### **Wacyigalin iyo Baraarujin (outreach) Shaqada Golaha ku saabsan oo la qaaday**

**22 ilaa 26 December 2019** Saraakiil ka tirsan Golaha Wakiilada JSL ayaa waxay Wacyigelin bulsheed ka qabteen qaar ka mida Gobolada dalka. Wacyigelintan oo ku saabsanayd Ku bararujinta bulshada ee Shaqada baarlamaanka iyo doorarka uu ku leeyahay dalka.



*Saraakhiisha G.Wakiilada oo Bulshada Gobolada dalka la hadlaya, kuna wacyigalinaya shaqada G. Wakiilada*

Ujeeddada Barnaamijkan aqoonta Bulshadu u leedahay Shaqada G/Wakiilada iyo in Sare Loo qaado Xidhiidhka Ka Dhexeeyo Golaha Wakiiladda iyo Shacabka waxay ahayd:-

- ✓ In Golaha Wakiiladu Xaqiijiyo Sugnaanshaha Warbixinta ay Soo Saareen Ururradda Bulshade 2016-kii, Taasoo ay ku Tilmaameen Inuu Hooseeyo Fahamka Guud ee Shacabka Reer Somaliland Ka Haystaan Shaqada iyo Waajibaadka Golaha Wakiiladda.



- ✓ In Sare Loo qaado Xidhiidhka Ka Dhexeeyo Golaha Wakiiladda iyo Shacabka Soo Doortay, si ay u Fahmaan Shaqada Golaha, helaana meelo ay kala soo xidhiidhi karaan.

Laba Kooxood oo isugu jira Agaasime Waaxeedyada golaha iyo la taliyayaasha Golaha ayaa u kala baxay Gobolada Bariga iyo Galbeedka. kooxda Gobolada Barriga u baxay waxay tageen Magaalooyinka iyo Tuulooyinka kala ah:-

- Degmda Abdaal.
- Degmada Qayta
- Degmada Burco
- Tuulada Qoryaale
- Degmada Caynabo
- Tuuladda Habari heshay

Halka qolada Gobolada Galbeedka u baxday tageen Magaalooyinka iyo Tuullooyinka kala ah:-

- Degmada Arabsiyo
- Tuulada Abaarso
- Tuulada Kala-baydh
- Tuulada Illmo Deddo
- Degmada Borama
- Tuuladda Aways
- Degmada Qol-ujeed

Bulshada deegaamada kala duwan iyo tuulooyinka ayay isu soo baxyo wacyigelineed ka wadeen taas oo ay bulshada ugu faah-faahiyeen shaqada Baarlamaanku qaranka u hayo.

### **Tababaro La siiyay Shaqaalaha Golaha**

**16-17/10/2018** Waxaa Shaqaalaha Hadal-qoraalka iyo Gudiyada ee labada aqal Baarlamaan (Guurtida iyo Wakiilada) loo qabtay Tababar socday labaas cisho oo ka qabsoomay Hotel Fish \$ Stick. Waxaa lagu tababaray shaqaalahaas hab-qoraalka Baarlamaanka ee Fadhiyada iyo Kulamada Gudiyada, waxaana labadaas cisho lagu siiyay aqoon isugu jirta theory iyo practical sida loo qaado xogta laga hadlay oo qoraal looga dhigo ilaa nuqulada ugu dambeeya sida loo kayd gareeyo.

### **Isfaham laga Gaadhay Xeerkaa Kufsiga ee Muranka Bulshada ka dhex abuuray**

Waxa Xal iyo afgarad laga gaadhay Murankii sharci ee ka tagnaa Xeerka kufsiga oo bulshada ka dhex dhaliyey dood iyo shaki balaadhan oo lagaga soo horjeedo Xeerka Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga xeerkaas oo dhawaan Madaxweynaha JSL Md. **Muuse Biixi Cabdi** uu ku dhaqan geliyey digteero Madaxweyne isla markaana uu ku soo saaray Faafinta Rasmiga ah.

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa Golaha ku martiqaaday Culimada waaweyn ee dalka si ay uga shaafiyaan uguna sharaxaan xeerka Kufsiga wixii aan munaasib ahayn ee diinteena xadgudubka ku ahna looga saari lahaa.

Culimada waaweyn ee dalka oo uu hogaaminayo Wasiirka wasaarada diinta iyo awqaafta Somaliland ayaa kulan maalin qaatay waxay la yeesheen shirgudoonka oo ay wehelinayaan mudanayaal ka tirsan Golaha, waxayna isla eegeen salka khilaafka xeerka iyo isfaham xumada sababtay in Masaajidada laga cambaareeyo waxaanay markuu shirkaasi soo dhamaaday warbaahinta wada jir ugu sheegeen inay iska afgarteen islana qaateen in xeerkaas dib laysula eego markaa haday jiraan qodobbo diinta ka hor imanayana laga saaro maadaama aynu dal islaam ah nahay.

Gudoomiyaha Golaha ayaa Culimada ku booriyey in goluhu u furan yahay mar walbana ay diyaar ula yihiin sixista wixii ay qoonsadaan ee aanay masaajidka ka cambaarayn ee ay xafiiiska ugu yimaafaan una sheegaan wixii qaloocan ee ay arkaan.

Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta ayaa isaguna Raali gelin Golaha ka siiyey hadaladii culimadu ku soo weerartay ugana mahadnaqay sidii qiimaha lahayd ee Golaha ay isula qaateen sixista wixii inaga wada qaloocda.

### **Xildhibaanada G/Saaxil laga soo doorto oo Kormeer ku tagay Gobolkaas.**

**22 December, 2018** Xildhibaanada Golaha Wakiiladda ee laga doorto Gobolka Saaxil, ayaa safar shaqo ku yimaadeen Gobolka saaxil casimadiisa berbera, iyagoo ujeedada safarkooduni ahaa xog-ogaal u noqoshada dadkii soo doortay iyo deegaanadii laga soo doortay marxalada ay ku suganyihiin.



*Xildhibaanada Gobolka Saaxil laga soo doortay oo kormeeraya halka Dekada cusub loo baneeyay*

Mudaddii ay Xildhibaanadu Gobolkaas ku sugnaayeen waxay kulamo la yeesheen maamulka Goboka, iyagoo sidoo kale kormeero ku soo sameeyay.



- Dekada Magaalada Berbera iyo Maamulkeeda
- Madaarka Magaalada Berbera iyo Maamulkeeda
- Isuduwayaasha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawlada ee heer Gobol

Kulamada kala duwan ee ay la yeesheen Masuuliyiinta kala duwan ee goobahaas aan soo sheegnay waxay ka xogwaraysanayeen shaqadoodu siday u socoto, waxyaabihii u qabsoomay, baahiyaha ay qabaan, hadii ay jiraan waxyaabo caqabado ka haystaan iyo guud ahaan waxyaabaha mid kasta u qorshaysan. Sidoo kale kormeerka ay ku soo mareen goobahaas waxaa ka mid ahaa kormeer ay ku soo indho-indhaysay siday shaqada dekadu u socoto iyo halka laga wado dhismaha dekada cusub, madaarka magaalada Berbera iyo siduu u shaqaynayo iyo laamaha hay'addaha dawlada ee Gobolka.



*Shan Xildhibaan oo ka mid ah 10ka Xildhiban ee Gobolka Saaxil laga soo doortay oo Koormeeray Gobolkaas*



*Isuduwayaasha Gobolka Saaxil oo la kulmay Xildhibaanada laga soo doortay Gobolka oo kormeerayay Gobolka*

Kooxdan Xildhibaanada Gobolka Saaxil laga soo doortay waxay safarkoodani qaatay mudo 3 cisho ah, iyadoo guud ahaan wixii safarka uga soo baxay Warbixin ay ka soo diyaariyay isla markaana Golaha u soo gudbiyay, warbixintaas oo xambaarsanayd waxyaabihii ay Gobolka ku soo arkeen

sida xaalada nololeed ee Bulshada Gobolka, siday u shaqaynayaan laamaha Dawlada ee heer Gobol sida Dekada, Madaarka iyo Maamulka heer Gobol iyo caqabadaha ama baahiyaha laamahaas kala duwan ee dawlada haysta ama ka jira.

## **Wufuudihii Caalamiga ahaa ee Golaha yimi**

- **Wafti Sare oo midowga Yurub (EU) ka socday**

Geediga dhismaha dawladnimo ee Somaliland waxaa uu ahaa mid soo socdey tan iyo 1991-kii, waxana hubaal ah in Somaliland ay horumar fiican ka samaysay dhinaca koritaanka Dawladnimada.



*Gudoomiyaha oo Xafiiska kula kulmay Watiga ka socday midawga Yuruf oo hogaaminayay Ambassador Veronique Lorenzo*

Waddamo badan oo ka mida midowga yurub ayaa Somaliland kala shaqeeya dhismaha dhinaca dawlad wanaaga, dimuquraadiyada, doorashooyinka, dib u dhiska kaabayaasha dhaqaalaha iyo horumarka Arrimaha Bulshada.

Golaha wakiilada ee hadda jooga oo ah kii ugu horeeyey ee ku yimaad hanaanka hal qof iyo hal cod, tan iyo markii la soo doortay Golahan waxay midowga (EU) kala shaqaynayaan kobcinta aqoonta shaqaalaha iyo xildhibaanada iyo tobabaro la siinayo, dib u dhiska dhismayaasha Baarlamaanka, iyo qalabeynta xafiisyada guddiyada.

Taariikhdu markay ahayd 18 April 2018 ayaa wafti uu hogaaminayso wakiilka midowga Europe (EU) u qaabilsan Somalia iyo Somaliland **Ambassador Veronique Lorenzo** safar shaqo oo kooban ku soo gaadhey xarunta Golaha Wakiilada Somaliland. waftigani markii ay soo gadheen xarunta



Golaha, ugu horeyn waxay kulan la qaateen gudoomiyaha Golaha Wakiiladda **mudane Baashe Maxamed Faarax**, waxay waftiga **Ambassador Veronique Lorenzo** ay ka warbixisyeen ujeedada guud ee safarkooda, waxayna xusteen in ujeedka safarkoodu yahay u kuur-galida xaalada guud ee dalka, siyaasada iyo baahiyaadka ku gadaaman golaha wakiilada, iyo inay qiimeeyaan oo ogaadaan waxyaabihii EU-da ka kaalmaysay Golaha wakiilada raadka fiican ee ay kaga tageen iyo sida ay wax uga badaleen shaqada Golaha.

Waxa waftiga EU-da safiirka ku wehelinayay laba khabiir oo madaxbanaan, kuwaas oo su'aalo dheeriya si gaara ay isu wareysteen Xoghaya Guud iyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta. waxay si mugleh uga waramaan barnaamijyada ay EU-da ka kaalmaysay inay dhamaantoon si hufan u fulaan, waxay kaloo ka wada hadleen labada dhinac (EU iyo Baarlamaanku) Qorshaha Golaha wakiilada ee sanadkan 2018, iyo waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay doonayaan inay qabtaan.

- **Waftigii Baarlamaanka Dalka Uganda**

**19/07/2018** Waxaa Dalka yimi Wafti Xildhibaanoo ka socday Baarlamaanka Dalka Yugaandha, waftigan oo ka koobnaa 4 Xildhibaan ayaa dalka lagu soo dhoweeyay, waxayna soo booqdeen Golaha Wakiilada iyagoo kulan la yeeshay Gudoomiye ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> **Dr. Cali Yuusuf** iyo koox Xildhibaanoo ah oo ka mid yahay Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada Md. Axmed Kijaandhe, Xildhibaan Hogaaminayay Waftiga iyo Gudoomiyaha ayaa kulanka ka dib wada-qabtay Shir-jaraa'id.



*Gud. Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada Dr. Cali Yuusuf iyo Gudoomiyaha Waftiga Baarlamaanka dalka Yugaandha*



*Waftigii Baarlamaanka Dalka Yugaandha oo la kulmay Gud. Ku-xigeenka 2aad iyo qaar ka mid ah Xildhibaanada*

- **Waftigii Sarkaalka u qaybsanaha Q. Midobay ee Somaliland iyo Somaliya**

Wafti uu hogaaminayay madaxa qaramada midoobey (United Nations UN) u qaabilsan Somalia iyo Somaliland iyo xubno ka socdey urur gobaleedka IGAD ayaa safar booqasho ku yimi Somaliland. intii waftigani joogey Somaliland waxay kulamo kala duwan la qaateen Madaxweynaha JSL iyo Gudoomiha Golaha Wakiiladda, waxayna kawada hadleen arrinta muranka siyaasadeedka cakiran ee u dhaxeeya Somaliland iyo Puntland iyo sidii loo soo afjari lahaa, nabad waartana looga dhalin lahaa gobolka sool iyo tukaraq.

Dhinaca kale, wufuuda urur goboleedka IGAD iyo Qaramada Midoobay ka socday ayaa waxay si gaara ula kulmeen Masuuliyiinta Xukuumada iyo Labada Gole ee Baarlamaanka kaga jira Deegaanka Gobolka Sool iyo Sanaag, kuwaas oo ay si gaara isula falanqeyeen xaalada ka taagan jiidaas iyo sidii nabad loogu soo dabaali lahaa. Gudoomiyaha Golaha wakiilada JSL mudane Baashe Maxamed Faarax oo shirgudoominayay ayaa warbaahinta u iftiimiyey waxyaabihii ay is yidhaahdeen weftiga iyo sida ay uga go'an tahay inay deegaanadaa nabadi uga as-laxdo, Gudoomiye Baashe Ayaa Maamul Goboleedka Soomaliyeed ee Puntland uga digay sheegashada dhulka Somaliland.

## **Safaradii loogu baxay Dalka Dibadiisa**

Golaha Wakiilada Somaliland isagoo ka duulaya wajibaadkisa shaqo ee xoojinta xidhiidhka caalimiga iyo la jaanqaadka aqoonta barlamaanada aduunka, wuxu sanadkaa 2018 ugu baxay dalka dabiidisa safaro badan. Dhamaan safaraddisa waxay isugu jireen qaar xidhiidh xoojina, aqoon korodhsi iyo siyaasadba.



Safaradaas inta badan waxa ku wajahnaayeen dawlada Afrika ku yaal, sida dawlada jaar ka ee Ethiopia iyo Kenya.

### **Wafti ka kooban Golaha Wakiilada iyo Xukuumada oo dalka Kenya tagay.**

Wafti sare oo matalayey dawlada Somaliland ayaa waxay Safar shaqo oo qaatey 5 cisho ugu kiciteen magalada Nairobi ee caasimada dalka Kenya taariikhdu markay ahayd 07 August, 2018. Waftigan oo ka koobnaa 4 Xildhibaan oo ka socda Golaha Wakiilada gaar ahaan Guddida Dhaqaala, Maaliyada iyo Miisaaniyada, oo kala ahaa, Md. Maxamuud Axmed Obsiye, Md. Siciid Mohamed Cilmi, Md. Cabdiqadir Jibriil Tukaale iyo Md. Xuseen Maxamed Cigeh, oo weheliyaan Gudoomiyaha Baanka dhexe ee Somaliland Cali Ibrahim Jamac (Baqdaadi) Agaasimaha guud ee Wasaarada Qorsheynta Qaranka Mr. Cabdirashid Ibrahim Cabdiraxmaan, iyo sadex xubnood oo kale oo wafigan caawinayey oo uu ka mid yahay Agaasimaha Waaxda Qorsheynta ee Golaha Wakillada, Cabdinasir Cisman Maxamud, Agaasimaha Waaxeedka Kormeerka Bangiyada ee Baanka dhexe Mr. Cabdiraxmaan Muse Jamac, Iyo Madaxa Maamulka ee Score Project xafiiskooda Hargeysa Mr. Axmed Maxamed Nuur.

Waftigani intuu uu joogay Nairobi wuxuu kulano muhiim ah la qaatey hay'addo caalamiya oo dhawra oo degan Nairobi iyo safaarado muhiim ah, sida safarada chine iyo safarada Japan. 08th August 2018, waxaa shir muhiim ah u qabsoomey gudoomiyaha baanka dhexe iyo xubnaha ka socdey golaha wakiilada, waxayna isla lafo gureen sidii loo dardar galin lahaa xeerarka muhiimka ah ee aan wali la ansixin, kuwaas oo marka la ansixiyo wax weyn ka badali doonaa hawl-maalmeedka bangiga dhexe iyo guud ahaan qaab maamulka maaliyadeed ee dalkeena Somaliland, kulankaasi wuxuu ku dhamaadey is fahan iyo is af-garad.

09 August 2018, waftigii ka socdey Somaliland waxay booqdeen xarunta Bangiga Aduunka (World Bank) ee Nairobi halkaas oo ay kula kulmeen madaxda Bangiga Aduunka, Waxay labada dhinac is waydaarsadeen xoga muhiim ah oo ay ka mid tahay sii xoojinta wada-shaqeynta Bangiga Aduunka iyo dawlada somaliland ee musqtaqbalka, waxayna ka wada doodeen oo isla lafa gureen ansixinta iyo dhaqaajinta xeerarka qabyada ah, kuwaas oo in la helo ay muhiim u tahay qaranka Somaliland iyo guud ahaan shaqo wanaaga banka dhexe iyo bangiyada gaarka loo leeyahayba.

Waxaa sido kale xubno ka mid ah gudidda ay kulan la qaateen 09 August 2019, hay'adda wadda shaqaynta arrimaha dibada u qabilsan dalka jaban ee la yidha marka magaceeda lasoo gaabiyo JICA (Japan International Cooperation Agency), JICA oo ah hay'adda mucaawimo waxay ka taageertaa waddamo badan oo dunida ah, gaar ahaan waddamo soo koraya ee Africa, horumarinta kaabashaha dhaqaalaha iyo wax soo saarka sida beeraha IWM. Madaxda JICA iyo Somaliland waxay isku afgarteen in la xoojiyo xidhiidhka labada dal. JICA waxay balan qaadeen inay Somaliland iman doonaan lana shaqayn doonaan dawlada somaliland. Waxa iyana guul weyn oo la taaban karo waftigu kasoo hooyey, inay la kulmeen xafiiska qaramada midoobey ee Tabarucayaasha ee loo yaqaano (United Nations volunteers), kaas oo hawlgaliya dhalinyarada aqoonta leh ee doonaya inay mutadawiicn ku shaqeeyaan ururku, waxay balan qaadeen inay Hargeysa imanayaan shir muhiim ahna ku qaban doonaan, ugu yaraan dhalinyaro badan oo reer somaliland ahna ka hawlgalindoonaan hay'adda qaramada midoobey ee somaliland iyo Africaba degan.

10 August 2018, waxa waftigii Somaliland ka socdey uu warbixin ka dhageystey shirkad loo yaqaan (Earners and Young) oo sanadadanba ku hawlanaa tayeynta iyo kor uqaadida tayada iyo adeegyada

bangiga dhexe ee Somaliland uu bixiyo, iyagoo ka wakiil ah mashruuca score iyo Bangiga aduunka, waxayna xubnaha gudida u jeediyeen hawlaha ay qabteen intii ay baanka dhexe ee Somaliland la shaqaynayaan.

### **Wafti ka kooban Xukuumada iyo Golaha Wakiilada oo Itoobiyaha**

Wefti ka socda xukuumada Somaliland oo ay hogaaminayso Wasiirka Shaqo-galinta iyo Arimaha Bulshada Marwo Hinda Jaamac Gaani oo ay qayb ka ahayeen Gudoomiyaha Hayada Shaqaalaha Dawlada Sharmarke Geele, Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada C/risaaq Siciid Ayaanle Gudoomiyaha Gudidda Arimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada Cabdiraxmaan dheere Wasiiro Ku-xigeenada Wasaaradaha Qorshaynta iyo Maaliyada iyo qaar ka mida Madax Waaxeedyada Hayadaha Shaqalaha Dawlada ayaa hawlo shaqo u tagay caasimada dalka Ethiopia ee Adis-ababa.

Waftigan marka laga yimaado ujeedda ay halkaas u tageen, waxa ay casho sharaf wada yeesheen ardayda wax ka barata Machadka shaqaalaha dawlada ethopia si ay waxbarashada ugu dhiiri geliyaan ardayda reer somaliland kulan dheer oo weftida iyo ardayda ku dhex maray Hotel Friend Ship ayaa jawi farxadeed kuso dhamaadey.



*Wafti Somaliland ee Dalka Itoobiyaha oo Xoghayaha Guud C/risaaq iyo Xil. C/raxman Dheere ka mid ahaayeen*

### **Safarada Gudoomiyaha Golaha wakiilada ee Dalka Gudihiisa**

Gudoomiyaha Golaha wakiilada Somaliland wuxu safaro kala gadisan ugu baxay gobolada dalka Somaliland. Dhamaan Safarada Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ayaa salka ku haya xog-ogaal u noqoshada xaalada Gobolada sida arimaha nabadgalyada iyo horumarka.

### **Safarkii Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ee G/Sool iyo Jiida hore**

**16 May 2018** Wafti balaadhan oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Somaliland Md. Baashe Maxamed Faarax, qaybna ay ka yihiin xildhibaano ka tirsan Golaha wakiilada Somaliland, Wasiiro iyo Taliyayaal Ciidan ayaa gaadhay Magaalada Tukaraq ee Jiida hore, iyadoo Gudoomiyaha iyo Waftigiisu ay si balaadhan Ciidanka Qaranka ula qayb-saday guushii ay ka soo hooyeen Dagaal Maalintii 15 May dhexmaray iyaga Ciidanka Maamulka Puntland.



Intaas ka dib, **17 May 2018** Gudoomiyaha iyo Xildhibaanada ka tirsan aqalka Golaha Wakiiladu waxay kulamo gaar gaar ah la yeeshen Gudidda Nabadgalyada ee Magaalo madaxda Gobolka Sool ee Laascaanood. sidoo kale waxay kulamo kale la qaateen Isuduwayaasha Wasaaradaha/Hay'adda Dawlada ee Gobolka Sool.



*Gudoomiye Golaha Wakiilada Md. Baashe oo la hadlaya Ciidamada Qaranka ee Jiida hore (Tukaraq)*



*Waftiga Gudoomiyaha, W. Gaashaandhiga iyo Xildhibaanadii la socday farxadii guusha la qaybsanaya Ciidamada Jiida hore*

Xildhibaanada Gudoomiyaha ku wehelinayay Safarkaasi waxay kala ahaayeen:-

1. Md. Maxamed Jaamac Cabdi
2. Md. Siciid Maxamed Cilmi
3. Md. Maxamed Axmed Maxamed (Dhakool)

#### 4. Md. Axmed Maxamed Caateeye (Awoowe)

Waftiga oo Magaalada laascaanood mudo dhowr todobaad ah ku sugnaa waxay soo qabteen hawlo aad u muhiima oo ay ugu waynaayeen maamul daadejinta, Nabadgalyada iyo sidii laamaha Dawlada ee Gobolka u gudan lahaayeen shaqadooda, iyagoo 23 May soo saaray go'aamo ku saabsan Nabadgalyada oo ka koobnaa lix qodob nuxurkooduna ahaa in la ilaaliyo nabada, iyagoo go'aamiyay:-

- In cid aan ahayn Ciidamada aanay Magaalada hub la dhexmari Karin
- In baabuur taariko lahayn aanu magaalada dhexmari Karin
- In shir aan ogolaansho laga haysan Gudidda Nabadgalyadana aan la qaban Karin iyo go'aamo kale.

#### **Wafti uu Hogaaminayo Gudoomiyuhu oo G.Sool Xalin Shaqaayo u tagay**

Wefti balaadhan oo ay hogaaminayeen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL Mudane Baashe Maxamed Faarax iyo wasiirka wasaarada arrimaha gudaha mudane Maxamed Kaahin Axmed oo ay kana mid ahaayeen Wasiirka Waxbarashada Iyo Sayniska Yaasiin Xaaji Maxamuud Xiir, Taliye kuxigeenka guud ee ciidanka Boolis-ka, maamulka heer Gobolka iyo heer degmo ee Sool iyo isimada iyo waxgaradka deegaanka ayaa Rabi ku soo guuleeyey inay gacmahana isu saaraan labadii beelood ee wallaalaha ahaa ee Bahararsame iyo Qayaad ee dagaalada ehliga ahi dhawaan ku dhex maray deegaanada Dhumay, Dabataag iyo dharkayngeenyo.

Ergadan ku guntaday wallaalaynta iyo dib u soo celinta nabad ku wada noolaanshihii deegaanka ayaa muddo bil kaamil ah waxay ku sugnaayeen Deegaanada Gobolka SOOL ee ay dirirtu ka dhacday iyaga iyo ergooyinkii labadaas beelood wada xaajoodka uga qayb qaadanayay oo iyaga la'aantood hadaanay dhabar adayg iyo tanaasulaad muujin aan guul laga gaadheen Gar-naqidooda

Ergadan oo galabnimadii Khamiista 9kii bishii September 2018 ka caraabay magaalada Hargeysa ka dib markii ay dhiilo colaadeed iyo dhiig sokeeye ka soo yeedhay Dharkayn-geeye iyo Dabataag iyagoo subaxnimadii Jimceba ku waabariistay magaalada Laascaanood ee Xarunta Gobolka Sool halkaas oo ay kulamo hordhaca iyo kuwo xabad joojin ahba ka bilaabay gobolka. Ergadaas nabadayntu waxay muddo bil ah ka dib 09 October 2018 goaano ka soo saareen colaadaas.

Maalinimadii Salaasada ee taariikhdu ahayd 09/10/2018 ayaa shirkaasi nabadaynta ee loogu garnaqayey labada dhinac guul iyo gacmo isu saar walaalnimo lagu Soo gabagabeeyey waxana laga Soo saaray Go'aamo lagu kala xukumay oo waafaqsan Shareecada islaamka, dhaqanka iyo kuwo Xukuumadu soo saartay.





Sidoo kale waxaa maalintii xigtay ee arbacada taariikhduna ahayd 10/10/2018 loo kala qaaday labada beelood Ee Walaalaha ah go'aanada xukumadii lagu kala xukumay kii ugu horeeyey oo ahaa aaskii ama duugidii dadkii ku kala dhintay oo dhamaa 20 ruux. Mahad rabbi kadib waftiga ayaa ku guulaysatay inay Soo afjaraan colaadii deegaanadaas ka taagnaa kana unkay nabad iyo xasilooni ka dhex dhacda labada beelood ee walaalaha ah. waxayna si niyadsami ku jirto gacmaha isugu qabsadeen Nabad iyo sidii aanay mar kale colaadaasi u soo noqon.



*Gudoomiyaha Golaha iyo W. Arrimaha Gudaha oo mid ka mid ah Mashaariicda horumarinta dhagax-dhigaya*

Dhinaca kale, waftigan oo uu Gudoomiyuhu hogaaminayay waxay mudaddii bisha ahayd ee ay deegaanka ku sugnaayeen xadhiga ka jareen mashaariic horumarineed oo deegaankaas laga fuliyay, sidoo kale waxay qabteen kulamo lagu xoojinayo nabad iyo xasilooni Gobolka Guud ahaana, Xildhibaanada Golaha Deegaanka ee Magaalada Laascaanood ayay sidoo kale ka xogwaraysteen xaalada magaalada iyo sidii loo horumarin lahaa adeegyada Bulshada ee dadku u baahan yihiin, iyagoo waftigu ugu dambayn Caasimada Hargeysa dib ugu soo noqday 12 October 2018.

## **Mudanayaashii Golaha ka geeriyooday (Eebe ha u naxariistee)**

Intii lagu jiray sanadkii 2018 waxaa Golaha ka geeriyooday Rabi Naxariistii Jano ha ka waraabiyo, qabriga ha u nuuriyo Ehel, Qaraabadiisi iyo Qarankana Samir iyo Iimaan ha ka siiyee laba Mudane, kuwaas oo kala ahaa:-

No.	Mudanayaashii geeriyooday AHN	Taariikdii geerida	Mudanayaashii badalay
1.	Md. Ibraahim Axmed Haybe	9/04/2018	Md. Xuseen Axmed Caydiid
2.	Md. C/qaadir Askar Xasan	01/08/2018	Md. Saleebaan Diiriye Barre

Sidoo kale Waxaa **12 March 2018** Geeriyooday Rabi Naxariistii Jano ha kawaraabiyee Agaasimihii Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka Golaha Wakiilada **Mr. Cabdi Ismaaciil Xawaadle** oo muddo 21 sano ah Ka tirsanaa Agaasime Waaxeeyada Golaha, Ilaahay Qabri ha u Nuuriyee.



## Appendix

### Ajandayaashii Kal-fadhiyadii Sanadka 2018kii

#### Ajandihii Kal-fadhigii 36<sup>aad</sup>

10/03/2018

1. Warbixinta Shirgudoonka, iyo Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda G/W
2. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada uu marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Xeerka Maareynta Qashinka	Akhriska <sup>2aad</sup>	Guddi Gaar ah
2.	Xeerka Qandaraasyada Qaranka	Akhriska <sup>2aad</sup>	Gudidda Ilaalinta Hantida
3.	Miisaaniyadda Dawladda 2018	Akhriska <sup>1aad</sup>	Was.Maaliyadda
4.	Qabyo-qoral Xeerka Tamarta iyo Korontada	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudida deegaanka iyo khayraadka
5.	Xeerka Saxafadda	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudidda Arrimaha Bulshada
6.	Xeerka Doorshada Golaha Wakiilada	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudidda Arrimaha Gudaha iyo nabadgalayd
7.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamanka	Akhriska <sup>1aad</sup>	Akhriska <sup>1aad</sup>
8.	Qabyo-qoral Xeerka Macadanta Somaliland	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudidda deegaanka
9.	Qabyo-Qoral Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo saaristiisa	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudidda deegaanka
10.	Qabyo-qoral Xeerka Dakhliga Shidaalka	Arkhiska <sup>1aad</sup>	Gudidda Dhaqaalaha
11.	Xisaab –Xidhka 2016	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gud. Ilaalinta Hantida Qaranka
12.	Qabyo-qoral Xeerka Xawaladaha	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gud.Dhaqaalaha
13.	Qabyo-qoral Xeerka ilaalada Xeebaha Somaliland	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudidda arrimaha Gudaha
14.	Qabyo Qoraalka Xeerka Wadooyinka	Akhriska <sup>1aad</sup>	Gudida Gaadiiddka iyo Wadooyinka
15.	Xeerka Maydhiista Lacagta	Codayn	Gole waynaha

3. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
4. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

## Ajandihii Kal-fadhigii 37<sup>aad</sup>

07/07/2018

1. Warbixinta Shirgudoonka, iyo Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda G/W
2. Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada uu marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Wax ka bedelka Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka	Mooshin	Gudidda Arrimaha Gudaha
2.	Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Kaluumaysiga	Mooshin	Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka
3.	Xisaab –Xidhka A. Sanadkii 2016 B. Sanadkii 2017	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gud. Ilaalinta Hantida Qaranka
4.	Xeerka Maareynta Qashinka	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Guddi Gaar ah
5.	Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Codbixiyaasha.	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalayd
6.	Xeerka Shaqaalaha Baarlaman	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Joogtada
7.	Wax ka bedelka xeerka Nidaamka Garsoorka	Wax ka bedel	Gudidda Cadalaada
8.	Qabyo-Qoral Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo saaristiisa	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda deegaanka
9.	Qabyo-qoral Xeerka Dakhliga Shidaalka	Arkhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Dhaqaalaha
10.	Qabyo-qoral Xeerka Macadanta Somaliland	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka
11.	Qabyo-qoral Xeerka Xawaladaha	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gud.Dhaqaalaha
12.	Qabyo-qoral Xeerka ilaalada Xeebaha Somaliland	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda arrimaha Gudaha
13.	Qabyo Qoraalka Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudida Gaadiiddka iyo Wadooyinka
14.	Xeerka Maydhiista Lacagta	Codayn	Gole waynaha
15.	Wax kabadelka iyo kaabisata Xeerka Saxafaadda	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Arrimaha Bulshada

4. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
5. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
6. Iyo Wixii kale ee soo kordha

7. Warbixinta Guddida Joogtada ah ee Golaha Wakiilada
8. Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka
9. Uyeedhida Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta JSL
10. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

<b>No.</b>	<b>Magaca Xeerka</b>	<b>Marxalada uu marayo</b>	<b>Cida Gacanta ku haysa</b>
1.	Wax-ka badka iyo Kaabisata Xeerka Ciidanka Booliiska JSL <b>Xeer. Lr.63/2013</b>	Wax-ka bedel	Guddida Arrimaha Gudaha
2.	Xeerka Maydhiista Lacagta	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Guddida Dhaqaalaha
3.	Miisaaniyadda Qaranka <b>2019</b>	Xukumada	Xukumada
4.	Qabyo-qoral Xeerka Macadanta Somaliland	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Guddida Deegaanka iyo Khayraadka
5.	Qabyo-qoral Xeerka Xawaladaha	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gud.Dhaqaalaha
6.	Wax ka bedelka Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka <b>Xeer.Lr.23/2002</b>	Wax ka bedel	Guddida Arrimaha Gudaha
7.	Xisaab –Xidhka Sanadkii <b>2017</b>	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gud. Ilaalinta Hantida Qaranka
8.	Qabyo Qoraalka Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Guddida Gaadiiddka iyo Wadooyinka
9.	Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Codbixiyaasha.	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalayd
10.	Qabyo-Qoral Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo saaristiisa	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Guddida deegaanka
11.	Wax ka bedelka xeerka Nidaamka Garsoorka <b>Xeer Lr. 24/2003</b>	Wax ka bedel	Guddida Cadalaada
12.	Wax ka bedelka iyo kaabisata Xeerka Tamarta <b>Xeer Lr. 81/2018</b>	Wax-ka bedel	Guddida Deegaanka
13.	Qabyo-qoral Xeerka Dakhliga Shidaalka	Arkhiska 1 <sup>aad</sup>	Guddida Dhaqaalaha
14.	Qabyo-Qoraalka xeerka Hawl gabla iyo Xaqsiinta Ciidamada JSL	Akriska 1 <sup>aad</sup>	Guddida Arrimaha Gudaha
15.	Wax kabadelka iyo kaabisata Xeerka Saxafaadda <b>Xeer Lr.27/2004</b>	Wax ka bedel	Guddida Arrimaha Bulshada

11. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
12. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
13. Iyo Wixii kale ee soo kordh

## Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiiladda

No	Magacayada Xildhibaanka	Gobolka/Degmadda
1.	<i>Gud. Md. Baashe Maxamed Faarax</i>	G. Sool, Degmada L/canood
2.	<i>Gud. Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle</i>	G. Awdal, Degmada Boorama
3.	<i>Gud. Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed</i>	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
4.	Md. Abokor C/raxmaan Good	G. Awdal, Degmada Borame
5.	Md. Dr. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
6.	Md. Axmed Ducaale Bulaale	G. Sool, Degmada Ceynabo
7.	Md. Axmed Max'ed Diiriye (Nacnac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
8.	Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhari)	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
9.	Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
10.	Md. Cali Max'ed Aadan (Calibarre)	G. Sanaag, Degmada Xiingalool
11.	Md. Max'ed Baaruud Shide(Qamac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
12.	Md. Max'ed Cismaan Max'ed (Bulqaas)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
13.	Md. Cumar Axmed Saleebaan(Sanweyne)	G. Tog-dheer, Degmada Burco
14.	Md. C/laahi Ismaciil Faarax	G. Tog-dheer, Degmada Burco
15.	Md. Xuseen Axmed Caydiid	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
16.	Md. Ibraahim Axmed Reygal	G. Sool, Degmada Ceynabo
17.	Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
18.	Md. Siciid cilmi Rooble	G. Saaxil, Degmada Berbera
19.	Md. Max'ed X.Yusuf Axmed (Wabeyo)	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
20.	Md. Max'ed X.Max'uud Cumar Xaashi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
21.	Md. Max'ed Xuseen Xaaji Ciise	G. Saaxil, Degmada Berbera
22.	Md. Max'ed Jamac Cabdi	G. Sool, Degmada L/canood
23.	Md. Max'ed Cali Xirsi	G. Tog-dheer, Degmada Burco
24.	Md. Prof.Max'ed Cumar Aadan Jiir	G. Tog-dheer, Degmada Burco
25.	Md. Mahdi Xuseen Cadar	G. Awdal, Degmada Borame
26.	Md. Max'uud Axmed Obsiye	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
27.	Md. Aadan Xaaji Diiriye Dirir	G. Saaxil, Degmada Berbera
28.	Md. Aadan Muxumed Hoori (Matan)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
29.	Md. Axmed Barkhad Obsiye	G. Awdal, Degmada Borame
30.	Md. Axmed Xasan Adan (Weysa cade)	G. Saaxil, Degmada Berbera
31.	Md. Axmed Max'ed Nuur	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
32.	Md. Baar Siciid Xaaji Faarax	G. Sanaag, Demada Dhahar
33.	Md. C/raxman Muuse Jamac	G. Sool, Degmada L/canood
34.	Md. C/casiis Ismaaciil Ducaale	G. Tog-dheer, Degmada Burco
35.	Md. C/kariim Aw Cali Shabeel	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
36.	Md. C/qaadir X. Ismaciil jirde	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
37.	Md. C/qaadir Jamac Xamuud	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
38.	Md. C/raxmaan Max'ed Jamac (A-xoog)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
39.	Md. Cali Obsiye Diiriye (Cali Gebiley)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
40.	Md. Cali X.Max'ed Muuse	G. Tog-dheer, Degmada Burco
41.	Md. Cali Sh.Ibraahim Aareeye	G. Awdal, Degmada Seylac
42.	Md. Farxan Max'ed Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
43.	Md. Xasan Xuseen Shide	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
44.	Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf	G. Tog-dheer, Degmada Burco
45.	Md. Maxamed Jaamac Cabdi (Gaaxnuug)	G. Saaxil, Degmada Berbera
46.	Md. Max'ed Axmed Max'ed (Dhakool)	G. Sool, Degmada L/canood
47.	Md. Max'uud Dhunkaal Guutaale	G. Sool, Degmada Ceynabo

48.	Md. Axmed Maxamed Caateeye	G. Sool, Degmada L/canood
49.	Md. Max'ed Saalax Cige	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
50.	Md. Max'uud Jaamac X.Cilmi (Dable)	G. Saaxil, Degmada Berbera
51.	Md. Siciid Cartan Cisman	G. Saaxil, Degmada Berbera
52.	Md. Cabdi Maxmed Jaamac (Gaagaale)	G. Awdal, Degmada Borame
53.	Md. Bashiir Sh.Xuseen Tukaale	G. M/jeex, Degmada Gabiley
54.	Md. Saleebaan Diiriye Barre	G. Sool, Degmada Ceynabo
55.	Md. C/raxmaan Cismaan Caalin	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
56.	Md. Xaashi Xuseen Caabi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
57.	Md. Faraax Max'uud Cabdulle	G. Saaxil, Degmada Berbera
58.	Md. Jaamac Xasan Aadan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
59.	Md. Mahdi C/laahi Max'uud	G. Awdal, Degmada Borame
60.	Md. Ibraahim Mahdi Buubaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
61.	Md. Xuseen Maxamed Cige	G. Tog-dheer, Degmada Burco
62.	Md. Max'ed Faarax Qabile	G. Saaxil, Degmada Berbera
63.	Md. Max'ed Jamac Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
64.	Md. Muuse Max'ed Ismacil (Hoos u jeed)	G. Awdal, Degmada Borame
65.	Md. Naasir X. Cali Shire	G. Tog-dheer, Degmada Burco
66.	Md. Siciid Maxamed Cilmi	G. Sool, Degmada L/canood
67.	Md. Ibraahim Caraale Cabdi	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
68.	Md. Dr. Maxamed Axmed Cabdi (Carabayto)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
69.	Md. C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	G. Awdal, Degmada Borame
70.	Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacky)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
71.	Md. Siciid Warsame Ismaaciil	G. Sool, Demada Ceynabo
72.	Md. Wali Axmed Xaawo	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
73.	Md. Axmed Faarax Jooj	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
74.	Md. C/qaadir Jibril Tukaale	G. Awdal, Degmada Borame
75.	Md. Cabdi Hiirad Warbaa Faahiye	G. Sool, Degmada L/caanood
76.	Md. Maxam'ud J. Warfaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
77.	Md. Xasan Muuse Hufane	G. Awdal, Degmada Borame
78.	Md. Xaamud Cisman Cigaal	G. Saaxil, Degmada Berbera
79.	Md. C/raxman Maxamed Jaamac	G. Awdal, Degmada Borame
80.	Md. Ismaaciil Maxamed Xasan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
81.	Md. Axmed Cabdi Kaahin	G. Awdal, Degmada Saylac
82.	Md. Yuusuf Liibaan Cumar	G. Sanaag, Demada Ceergaabo

## Liis-ka Hawl-wadeenada iyo Shaqaalada Golaha Wakiillada

No.	Magac	Shaqada/Xilka
1.	Abdirisak Sa'ed Ayanle	Xoghayaha Guud ee Golaha
2.	Jamal Jama Hassan	Xoghaye ku-xigeenka Golaha
3.	Awad Ali Mohamed	Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka, Golewaynaha iyo Gudiyada
4.	Farah Ibrahim Gamute	Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka
5.	Mahamuud Sulamen Omer	Agaasimaha Waaxda ITga iyo Cilmi-baadhista
6.	Abdinasir Osman Mahamoud	Agaasimaha Waaxda Qorsheynta
7.	Hibo Mohamed Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Xusuus-dhowrka
8.	Ismahan Yusuf Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha
9.	Ahmed Mohamed Eige	Agaasimaha Waaxda Hab-maamuuska iyo Amniga
10.	Sulieyman Abdisitar Dubad	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Dadweynaha iyo Warbaahinta
11.	Yusuf Habib Husein	Agaasimaha Waaxda Laybareeriga
12.	Faysal Ibrahim Esse	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Gobolada
13.	Hamse Mohamoud X. Muuse	Agaasimaha Xafiiska Miisaaniyada
14.	Mohamed Sa'eed Husein	Xisaabiyaha Guud ee Golaha Wakiilda
15.	Mustafe Mohamed X. Dahir	La-taliyaha Sharciga (Legal Advisor)
16.	Abdirahman Hirad Jamac	La-taliyaha Sharciga (Legal Advisor)
17.	Abdirisaaq Maxamed Siciid	La-taliyaha Sharciga (Legal Advisor)
18.	Mubarik Farah Warsame	La-talyaha Siyaasda (Policy Advisor)
19.	Sa'ed Farah Hashi	La-taliyaha Mashaariicda
20.	A/risaq Muse Idle	La-taliyaha Arrimaha Gudaha
21.	Mohamed Abdirahman Ducale	La-taliyaha Luuqada Carabiga
22.	Abdirisaaq Ibrahim Mohamed	La-Taliyaha Arrimaha Caalamiga ah
23.	Axmed Xasan Cali (Casoowe)	La-taliyaha Gudoomiyaha
24.	Ahmed Mohamed Hashi	La -taliyaha Dhaqanka
25.	Mohamud Hussein Sa'eed	La taliye
26.	Huda Mohamed Ahmed	Madaxa Xafiiska Xoghayaha Guud iyo Madax-qaybedka Gudiyada
27.	Abdillahi Abdi Adan	Madax-qeybedka Hadal-qoraalka iyo Xoghaynta Gudida Cadalada
28.	A/Rahman Jama Nur	Madax-qeybedka Warbahinta iyo Xoghaynta Gudida A. Gudaha
29.	Asiya Rashiid Egge	Madax qaybeedka Shaqaalaha
30.	Aydarus Ega Khayre	Madaxa Daabacaadaha
31.	Sa'ed Jirde Haybe	Muuqaal qaade (Camera Man)
32.	Mahad Omer Sa'eed	Madax-qeybeedka Golewaynaha iyo Xoghaynta Gudidda I&DHQ
33.	Seaad Yasin Ismcil	Madax-qeybeedka Daabacaadaha
34.	Khadra Hussein Jama	Madax-qeybeedka Waaxda Shaqaalaha
35.	Mustafe Mohamed Hassan	Madax-qeybeedka Cilmi Baadhista
36.	Wacaysa Ali Ahmed	Madax-qeybeedka Qorsheynta
37.	Ali Axmed Ibrahim	Xoghaynta Gudidda Sirdoonka iyo Amniga
38.	Ayanle Ahmed Abdi	Xoghaynta Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
39.	Ridwan Abdillahi Abdi	Xoghaynta Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicga
40.	Maxamed Yusuf Ayanle	Xoghaynta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
41.	Ali Mohamed Hassan	Xoghaynta Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka
42.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xoghaynta Gudidda Arrimaha Didabada
43.	Sahal Guled Xadi	Madax-qeybedka Waaxda H. Maamuuska iyo Xog. G. Arr.Bulshada
44.	Amal Ahmed Iman	Madax-qeybedka Xafiiska Xuus-dhowrka
45.	Cawo Mukhtar Cumar	Xoghaynta Xafiiska Xuus-Dhowrka
46.	Mohamed Mohamud Osman	Madax-qeybedka Waaxda Qorsheynta
47.	Cabdicasiis ibraahim Jaamac	Madax-qeybedka Waaxda IT



48.	Hodan Aadam Siciid	Xoghaynta Xafiiska Hadal-qoraalka
49.	Khadra Suber Nux	Xoghayn Labad Xafiiska Gudidda I&DHQ
50.	Abdirkarim Muse Ibraahim	Xoghayn Xafiiska Aminga
51.	Abdiaziz Nur Ali	Xoghayn Xafiiska IT iyo Cilmi Baadhista
52.	Nur Diiriye Abdilaahi	Xoghayn Xafiiska IT iyo Cilmi Baadhista
53.	Fu'ad Jama Ahmed	Xafiiska IT iyo Cilmi Baadhista
54.	Mohamed Hussein Eilmi	Xoghayn Xafiiska Hadal-qoraalka
55.	Saado Abdillahi Abdi	Xoghayn Xafiiska Hadal-qoraalka
56.	Warsame Bashe Farah	Xoghayn Xidhiidhka Dadweynaha iyo Warbaahinta
57.	Fadxiya Cali Xasan	Xoghayn Xafiiska Hab-Maamuuska iyo Amniga
58.	Hamse Nux Ahmed	Xoghayn Xafiiska IT
59.	Nagaad Cabdi Ismaciil	Xoghanta Xafiiska Xisaabaadka
60.	Mohamed Hassan Mohamed	Muuqaal qaade (Camera Man)
61.	Ahmed Osman Farah	Madaxa Xafiiska Waaxda Hab-maamuuska iyo Amniga
62.	Dheg Adan Bile	Xirfadle dabka iyo Electronika
63.	Nasra Mawliiid Cabdi	Xoghayn Xafiiska Maaliyada
64.	Farxaan Xiise Maxamuud	Xoghaynta Xafiiska Waaxda Shaqaalaha
65.	Muhiim Maxamed Ibraahim	Xoghaynta Laybareeriga
66.	Guled Ahmed Jama	Xirfadle
67.	Shukri Ahmed Abdillahi	Xoghayn Labad ee Gudidda Joogta
68.	Omer Mohamed Aden	Xoghayn Xafiiska Maaliyada
69.	Deeq Ali Aareeye	Xoghayn Xafiiska Maaliyada
70.	Cabdirisaaq Ibraahim C/raxmaan	Xoghayn Xidhiidhka Dadweynaha iyo Warbaahinta
71.	Hoodan Maxamed Cismaan	Xoghayn Hab-maamuuska iyo Amniga
72.	Mukhtar Suldaan Saleebaan	Xoghayn
73.	Mahad Siciid Ismaaciil	Xoghayn
74.	Sahra Ibraahim Caraale Cabdi	Xoghayn
75.	Cabdirisaaq Axmed Aadan	Xoghayn
76.	Mohamed Ibrahim Ismail	Xoghayn
77.	Mohamed Mahamoud Husein Dube	Xoghayn
78.	Abdikarim Aydiid Abokor	Xoghayn
79.	Cismaan Maxamed Axmed	Xoghayn
80.	Faarah Diriye Mohamed	Dareewal
81.	Mohamed Hassan Diriye	Dareewal
82.	Fu'ad Omer Bare	Dareewal
83.	C/Salaan Saleebaan Cumar	Dareewal
84.	Maxamed Qaasiim Axmed	Dareewal
85.	Xuseen Maxamed Cumar	Dareewal
86.	Mohamed Muse Hassan	Washman
87.	Fosiya Osman Aw-Ali	Nadiifiso
88.	Safi Siyad Aw-Abdi	Nadiifiso
89.	Sahra Muse Hassan	Nadiifiso
90.	Fosiya Mahamoud Osaman	Nadiifiso
91.	Farhan Hise Mohamed	Nadiifiso
92.	Fahima Ahmed Guled	Nadiifiso
93.	Aasiya Maxamed Aw-Cali	Nadiifiso
94.	Koos Ahmed Nur	Nadiifiso
95.	Hinda Abdi Ismail	Nadiifiso
96.	Fadumo Hassan Ismail	Nadiifiso
97.	Safiya Ahmed Mohamed	Nadiifiso

98.	Saynab A/rahman Mohamed	Nadiifiso
99.	Saynab Kosar Husein	Nadiifiso
100.	Samda Suleyman Warsame	Nadiifiso
101.	Sulekha Yusuf Ismail	Nadiifiso
102.	Shamis Mohamed Muse	Nadiifiso
103.	Yasmin Mohamed Hassan	Nadiifiso
104.	Hodan Dayiib Abiib	Nadiifiso
105.	Fardus Mohamed Hassan	Nadiifiso
106.	Miski Muxumed Jaamac	Nadiifiso
107.	Sulekha Cali Xasan	Nadiifiso
108.	Saynab C/raxmaan Maxamed	Nadiifiso
109.	Caasha Yuusuf Goone	Nadiifiso
110.	Nimco Maxamed Daa`uud	Nadiifiso
111.	Xaliimo Salaan Yuusuf	Nadiifiso
112.	Deeqa Qaalib Raage	Nadiifiso
113.	Milgo Aadan Bare	Nadiifiso
114.	Lucky Diiriye Bulqaas	Nadiifiso
115.	Yurub Nuur Cali	Nadiifiso
116.	Deeqa Cali Iid	Nadiifiso
117.	Faadumo Cumar Cabdi	Nadiifiso
118.	Maxamed Cali Faarax	Washman
119.	Ibrahim Sa'eed Ayanle	Madaxa Xafiiska Gobolka Tog-dheer
120.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xafiiska Gobolka Tog-dheer
121.	Ilhaan Abdi Warsame	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Tog-dheer
122.	Faysal Cabdi Jaamac	Madaxa Xafiiska Gobolka Sanaag
123.	Mohamed Ali Yusuf	Madax-xigeenka Xafiiska Gobolka Saanag
124.	A/rahman Mohamed Yusuf	Madaxa Xafiiska Gobolka Saaxil
125.	C.Wahab Aadan Axmed	Madax-xigeenka Xafiiska Gobolka Saaxil
126.	A/karim Omer Jama	Madaxa Xafiiska Gobolka Awdal
127.	Abdillahi Nur Farah	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Awdal
128.	Bade Cali Habane	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Awdal
129.	Sahra Cabdisalaan Xuseen	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Awdal
130.	Muxiyadiin C/raxmaan Muuse	Madaxa Xafiiska Gobolka Sool
131.	Mohamed A/Dahir Jama	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Sool
132.	Rooda Maxamed Cali	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Sool
133.	Sa'eed Abdule Gafane	Washman Gobolada
134.	Mohamed Abdi Hussein	Washman Gobolada
135.	Bare Mohamed Hassan	Washman Gobolada
136.	Ali Abdi Dalmar	Washman Gobolada
137.	A/fatah Yusuf H.Ali	Washman Gobolada
138.	Fosiya Osman Abdillahi	Nadiifiso Gobolada
139.	Saynab Jama Hirad	Nadiifiso Gobolada
140.	Deeqa H. Mohamed Ibrahim	Nadiifiso Gobolada
141.	Fadumo Sa'eed Eilmi	Nadiifiso Gobolada
142.	Halimo Mohamoud Mohamed	Nadiifiso Gobolada
143.	Xuseen Cabdi Jaamac	Joogto ahayn
144.	Caydiid Xiis Caydiid	Joogto ahayn
145.	Maxamed Axmed Isamciil	Joogto ahayn
146.	Cabdale Ciise Xasan	Joogto ahayn
147.	Yuusuf Cawil Dhool-haye	Joogto ahayn

148.	C/Nasiir Bashiir Tukaale	Joogto ahayn
149.	Daaha Xariir Ismaciil	Joogto ahayn
150.	Gudoon Xasan Aadan	Joogto ahayn
151.	Guuleed Cismaan Yuusuf	Joogto ahayn